**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

**WASAARADDA Qorsheynta Qaranka EE DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA (MoPIED)**

# QORSHAHA KA QEYBGELINTA DANEEYAYAASHA

## Barwaaqo (P177627)

**20-Jan-2023**

## SHAXDA TUSMADA

**SHAXDA TUSMADA** ........ **2**

**Liiska Shaxaha** ........ **3**

**Liiska Jaantusyada** ........ **3**

**SOO GAABINNADA IYO FASIRAADDOODA** ........ **4**

**1.0 HORDHAC** ........ **5**

1.4.2 Doorarka iyo Mas'uuliyadaha Heer Qaran ........ 11

**3.2 Aqoonsiga Daneeyayaasha** ........ **17**

**3.3 Mabaadii'da ka Qeybgalka Daneeyaha** ........ **21**

**4.0 QORSHAHA KA QAYBGALKA DANEEYAYAASHA** ........ **23**

**4.1 Barnaamijka Ka qaybgalka Daneeyayaasha** ........ **23**

**1.2 Shaacinta Macluumaadka Mashruuca** ........ **26**

**5.0 QORSHAHA KA MID NOQOSHADA** ........ **30**

**5.1 Noocyada Kooxaha Nugul iyo Kuwa Danyarta ah** ........ **30**

**46. Mashruuca wuxuu tixgelin gooni ah siin doonaa kooxaha danyarta, waxaana ka mid ah:** ........ **30**

**7.0 KHEYRAADKA IYO MAS'UULIYADAHA HIRGELINTA IYO LA SOCODKA SEP** ........ **41**

**7.1 Maareynta** ........ **41**

**7.2 Khayraadka/Dhaqaalaha** ........ **42**

**8.0 LA SOCOSHADA IYO KA WARBIXINTA** ........ **44**

**8.1 La socoshada** ........ **44**

**8.2 Ka warbixinta** ........ **46**

**LIFAAQA 2: Tusaalaha foomka cabashooyinka** ........ **51**

**LIFAAQA 3: Tusaalaha diiwaanka cabashooyinka ... 52**

**LIFAAQA 4: Tusaalaha foomka warbixinta cabashooyinka ... 53**

**LIFAAQA 5: Tixraacyo ... 53**

## Liiska Shaxaha

Shaxda 1: Wada tashiga Daneeyayaasha oo kooban ... 15

Shaxda 2: Sharaxaada daneeyayaasha iyo meelaha ay daneynayaan ... 17

Shaxda 3: Shaxda wada tashiga Daneeyayaasha ... 23

Shaxda 4: Soo bandhigidda Macluumaatka Mashruuca ee heerarka kala duwan ... 26

Shaxda 5: Qaababka Xalinta Cabashooyinka iyo habraaca ... 38

*Shaxda 6: Miisaaniyadda lagu hirgelinayo Qorshahan (SEP)* ... **Error! Bookmark not defined.**

## Liiska Jaantusyada

**Jaantuska 1: Habraaca cabashooyinka ee mashruuca ... Error! Bookmark not defined.**

**Jaantuska 2: Habka Xallinta Cabashooyinka ee Mashruuca ... Error! Bookmark not defined.**

## SOO GAABINNADA IYO FASIRAADDOODA

| Soo gaabinnada | Englis version | Somali |
|---|---|---|
| ASAL | Arid and Semi-Arid Land | (Dhul Oomane iyo Oomane-u-Eke) |
| CBO | Community-based organization | (Urur Bulsho) |
| CoC | Code of Conduct, | (Xeerka Anshaxa) |
| CSO | Civil society organization | (Ururka bulshada rayidka ah) |
| DG | Director General | Agaasime Guud |
| ESF | Environment and Social Framework | (Xayndaabka Deegaan iyo Bulsho) |
| ESIRT | Environmental and Social Incident Reporting | Warbixinta Dhacdooyinka Deegaanka iyo Bulshada |
| ESMF | Environmental and Social Management Framework | Xeyndaabka Maareynta Deegaanka iyo Bulshada |
| ESS | Environment and Social Standards | Heerarka Bulshada iyo Deegaanka |
| FGS | Federal Government of Somalia, | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| FMS | Federal Member State | Dowladdaha Xubnaha ka ah Federaalka |
| FPIC | Free, prior, informed consent | Ogolaansho bilaash ah oo horay loo sii ogaysiiyay |
| GBV | Gender-based Violence | Xad-gudubyada ka Dhanka Haweenka |
| GRC | Grievance Redress Committee | Guddiga Xalinta Cabashooyinka |
| GM | Grievance Mechanism | Habka Xallinta Cabashooyinka |
| GRS | Grievance Redress System | Nidaamka Xallinta Cabashooyinka |
| IDPs | Internally Displaced Persons | Dadka ku Barakacay Gudaha Dalka |
| LMP | Labour Management Procedures | Hab-Maamulka Shaqaalaha |
| M&E | Monitoring and Evaluation | Kormeerka iyo Qiimaynta |
| MDAs | Ministries, Departments and Agencies | Wasaaradaha, Waaxaha iyo Wakaaladaha |
| MoEWR | Ministry of Energy and Water Resource | Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha |
| MoF | Ministry of Finance | Wasaaradda Maaliyadda |
| NGO | Non-governmental Organization | Urur aan Dawli Ahayn |
| NPCU | National Project Coordination Unit | Unugga isku-duwidda Mashruuca ee Heer qaran |
| OHS | Occupation health and safety | Bad-qabka Shaqada |
| OIP | Other Interested Parties | Daneeya-yaasha Kale |
| PAD | Project Appraisal Document | Dukumiintiga Qiimaynta Mashruuca |
| PAI | Project Area of Influence | Aagga Mashruuca laga fulinayo/saameynayo |
| PDO | Project Development Objective | Ujeedada Horumarinta Mashruuca |
| PMC | Project Management Committee | Guddiga Maaraynta Mashruuca |
| PWDs | Persons with disabilities | Dadka naafada ah |
| RPF | Resettlement Planning Framework | Qorsheynta Habka Dib-Udejinta |
| SEAH | Sexual Exploitation, Abuse and Harassment | Xadgudubka Galmada, Tacaddiga iyo Dhibaateynta |
| SEP | Stakeholder Engagement Plan | Qorshaha ka qeybgelinta Daneeyayaasha. |
| SPIU | State Project Implementation Unit | Unugga Hirgelinta Mashruuca ee Heer D/Goboleed |
| TOR | Terms of Reference | Shuruuddaha Tixraaca |
| WASH | Water and Sanitation Hygeine | Biyaha, Nadaafadda iyo Fayadhowrka |
| WBG | World Bank Group | Bankiga Adduunka |

## 1.0 HORDHAC

Mashruucu wuxuu awoodda saarayaa in la gaarsiiyo bulshada biyo nadiif ah, isla markaana ay ka qeyb-galaan maamulk, hawlgalinta iyo dayactirka biyaha dhulka (BDh). Sidoo kale wuxuu ka shaqaynayaa waxqabadyka kaabayaasha dhaqaale ee wax ku oolka ah, xogaha iyo aqoonta biyaha dhulka ka hooseeya/guntiisa ku jiro, iyo

ugu dambeyn dhisidda awoodda hay'adaha ka shaqeeya si loo xaqiijiyo helitaanka biyo nadiif oo ay ka qeybqaateen go’aankeeda bulshada deegaanka ku noo

Waxaa jirto goobo aan ammaan aheyn oo dalka soomaaliya ku yaal, halkaas oo ay ka dhacaan khilaafaat dabadheeraada oo ku saleysan muran dhul oo udhaxeeya beeraleyda iyo xoolo-dhaqatada , iyo barakacayaasha biyaha u baahan ee aan ka maarmin, kooxaha laga tiro badanyahay iyo qabaa’illka dhaxdooda. Waxaa jira kala duwanaansho ku wajahan jinsiga iyo da'da, marka loo eego helitaanka iyo maareynta biyaha. Waxay haweenku diiradda saaraan helitaanka biyaha ee u isticmaalka hawlaha guriga, halka ragguna ay yihiin go'aan-qaatayaasha maaraynta iyo isticmaalka khayraadka biyaha. Sidoo kale, dhalinyaradu wax masuuliyad ah oo weyn kuma laha maamulka iyo maareynta biyaha caadiga ah. Dhulka guud ahaan waxa uu hoos

yimaadaa lahaanshaha wadaagga ah ,xuquuqaha dhulka iyo isticmaalka khayraadkoodu maaha mid fudud, dumarkuna wax fikir ama ra'yi ah kuma laha arimaha la xiriira dhulka.

1. Mashruuca la soo jeediyay, waxaa laga hirgelin doonaa heer Dawladda Federaalka Soomaaliya (FGS) iyo heer Dawlad Goboleedka (FMS). Maamul goboleedyada ka qeyb galaya ayaa ah: Puntland, Jubaland, Hirshabeelle, Galmudug iyo Koonfur Galbeed. Mashruucu wuxuu la jaan qaadayaa Istaraatiijiyada Kheyraadka Biyaha Qaranka (2021-2025), taas oo tilmaamaya saddex yool oo saldhig u ah horumarinta biyaha dalka:

   *Yoolka 1: Aasaasidda Xayndaabka Maamulka Biyaha oo Shaqaynaya*. Tani waxey ku hagaysaa habka istiraatijiyadeed iyo tallaabooyinka lagu xoojinayo maamulka biyaha.

   *Yoolka 2: Hawlgelinta Maareynta Isku-dhafan ee Kheyraadka Biyaha.* Maamulka iyo maareynta isku dhafan ee khayraadka biyaha, ayaa saldhig u ah xaqiijinta horumarinta kheyraadka biyaha waara iyo bixinta adeegyada fayadhowrka.

   *Yoolka 3: Hagaajinta Bixinta Adeegyada Biyaha ee Mudnaanta leh* iyo tallaabooyinka lagu hagayo horumarinta kheyraadka biyaha, si loo xaqiijiyo hagaajinta adeegyada kala d

**1.1 Ka faa'idaystayaasha Mashruuca**

19. Ka faa'idaystayaasha mashruucu waxay noqon doonaan bulshooyinka ku dhiban biyo la'aanta daran ee ka jirta Soomaaliya, taana waxa keenaya xaaalado daran oo sii kordhaya, kuwaas oo la xiriira is bedelka cimilada, kororka bulshada, iyo khilaafka sii kordhaya oo ku saabsan khayraadka yar oo bulshada u dhexeeya. Tirade guud ee ka faa'idaystayaasha waxaa lagu qiyaasay 350,000. Waxayna ka koobanatahay:

- **Bulshada miyiga**. Ma haaystan biyo nadiif ah oo kufilan, taas oo ay ku xaqiijin karaan xaaladaha caafimaadka noloshooda.

- **Milkiilayaasha xoolaha**. Kala bar waxay daboolaan ama siiyaan bulshada Soomaaliyeed cunto ku filan, waxayn qayb ka yihiin dhaqaalaha dhoofka dalka.

- **Haweenka iyo gabdhaha yar yar**. Dhaqan ahaan iyagaa mas'uul ka ah keenista biyaha guriga, waliba masaafooyin aad uga fog guriga.

- **Bulshada ku dhaqan magaalooyinka.** Waxay ku tiirsan yihiin biyaha dhulka hoostiisa/ceelasha ee miyiga laga keeno, iyadoo loo dhaaminayo magaalooyinka, kuwaas oo ay fududaynayaan shirkado gaar loo leeyahay, laguna iibiyo inta badan qiimo aad u sareeya.

**Marka la joogo heer haayadeed**, ka faa'idaystayaashu waxay ka koobnaan doonaan haay'ado mas'uul ka ah maaraynta biyaha dhulka hoostiisa/ceelasha ee heer federal, dawlad-goboleedyada xubnaha ka ah, iyo degmooyinka, kuwaas oo aanay ka madhneyn wasaaradaha ay khuseyso, waaxyaha iyo hay'adaha arimahan oo kale ka shaqeeya.

Ka faa'idaystayaasha aan tooska ahayn, waa kuwa ka faa'idaysan doona helitaanka macluumaadka biyaha dhulka hoostiisa/ceelasha iyo sidoo kale siyaasadaha lagu sameeyay heer federaal iyo heer dawlad goboleed oo xubin ka ah federaalka, si loo ogaysiiyo go'aan gaarida iyo sare u qaadida isticmaalka khayraadka biyaha oo waara.

**1.2 Qabanqaabada hirgelinta mashruuca: -** Hirgelinta mashruuca waxaa hogaamin doona wasaaraddaha heer dawlad goboleed, halka isku dubarididda guud, dabagalka iyo ka war bixinta horumarka mashruuca ay leedahay Dowladda federaalka Soomaaliya .

### 1.2.1 Mas'uuliyaha iyo Doorarka Heer Federaal

**20. Waxaa loo dhisi doonaa Guddi Maareyn Mashruuc oo u Dhaxeeya Wasaaradaha Federaalka (PSC) ee mashruuca, wuxuuna ka koobnaan doonaa wakiilo ka socda wasaaaradaha federaalka ee soo socda**.
a) Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha( MoERW); (b) Wasaaradda Maaliyada (MoF); iyo (c) Wasaaarada Biyaha ee Dawladaha Xubnaha ka ah federaalka. Xubinimada guddiga wuxuu ka koobnaan doonaa saddex wakiil oo ka socda Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha - MoEWR , hal wakiil oo ka socda Wasaaradda Maaliyada -MoF iyo labo wakiil oo ka socda wasaaradda biyaha ee FMS. PSC ga, waxaa guddoomin doona MoERW. Guddiga maaraynta wuxuu kulmi doonaa saddexdii biloodba mar, si ay dib uugu eegaan horumarka mashruuca, una xalliyaan arrimaha hirgelinta mashruuca, ee waaxyaha iyo wasaaraddaha kala duwan iyo in la ogaado arrimaha siyaasadda iyo xeerarka la xiriira. Isku-duwaha Mashruuca Qaranka ayaa soo saari doona warbixinta kulanka PSC.

21. **Shaqaalaha Iskuduwidda mashruuca ee heer Qaranka (NPCU), oo uu hogaamiyo Iskuduwaha Mashruuca, ayaa la dejin doona/xafiis laga siin doonnaa Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha ee federaalka**. Iskuduwaha Mashruuca Qaranka wuxuu noqon doonaa shakhsi ay heshiis la gashay Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka biyaha (MoERW). Isuduwaha Mashruuca Qaran, waxaa lagu soo xuli doona hab tartan ah. Isuduwaha Mashruuca wuxuu ahaan doona xubin ka tirsan Guddiga Maaraynta Mashruuca (PSC), iyo sidoo kalana isagoo noqon doonaa xoghayaha. Isuduwaha Mashruuca wuxuu si dhow ula shaqayn doonaa dhigooda Bangiga Adduunka iyo Guddomiyaha Guddiga Maareynta Mashruuca (PSC).

**22. Iskuduwaha Mashruuca waxaa taageeri doona koox injineerada biyaha ah, khubaro sare oo ku takhasusay biyaha dhulka hoostiisa ku jira, iyo khabiiro aamin ah (ilaalinta deegaanka iyo bulshada, wax soo iibsiga iyo maaliyadda) iyo khabiir ku takhasusay M&E oo ka imaanaya MoEWR.** Dhamaan shaqaalahan ayaa lagu soo xuli doonaa qaab tartan kusalaysan, waxayna heli doonaan gunno ku salaysan mas'uuliyadda ay markaas hayaan Haddii aan laga heli karin shaqaale u qalma dawladda dhexdeeda, markaas la –taliyaal ayaa laga yaaba in qandaraas la siiyo, iyadoo la raacayo siyaasadaha soo iibsiga iyo Buuga Capacity Injection-ka (CIM). Khubarada kale ee looga baahanyahay hawshaas ayaa la magacaabi doonaa si ku meel gaar ah.

### 1.2.2 Doorarka iyo Mas'uuliyadaha Heer Qaran

**23. Hay'adaha Hirgelinta Mashruuca Heer Dawlad Goboleed. Dawlad goboleed kasta waxay samayn doontaa Hay'adda Hirgelinta Mashruuca ee Heer Dawlad Gobaleed (PIU) ee Wasaaradda Khayraadka Biyaha. Ujeedada PIUs-yadan waxay tahay, in la maareeyo hirgelinta hawlaha mashaariicda heer dawlad goboleed.** Ujeedada PIU-yadani waa inay maareeyaan fulinta hawlaha mashruuca ee heer gobol. PIUs-ka waxa ka shaqeyn doono shaqaale dawladeed, kuwaas oo heli doona gunnooyinkooda ku salaysan masuuliyooda. Khibradahooda ayaa heshiis lagula geli doonaa hadba sida loogu baahdo. Khubarada waxaa ka mid noqon doona, oo aan ka soo qaadan karnaa kuwan: qofka maamula mashruuca ee heer state,

Khabiirada ilaalinta, lasocodka iyo qiimeynta iyo khabiir ka shaqeeya arimaha xasaraddaha jinsiga ku salaysan (GBV), iwm. Mashruuca GW4R iyo PIUs, labaduba waxay hiigsan doonaan dheelitirka jinsiga ee dhanka shaqada. . Tani waxay sidoo kale gacan ka geysan doontaa horumarinta kaadirka haweenka injineerada ama khabiirada biyaha ee Soomaaliya.

**24. Hay'adaha heer bulsho iyo Wacyigelinta**. Hawlaha mashruuca oo lagu hirgeliyay heer bulsho, waxaa ka shaqayn doona hay'adaha bulshada matalaya oo ka socda kooxaha daneeyayaasha kala duwan ee xaafadaha/bulshada dhexdeeda. Doorka ugu weyn ee hay'adahan heerka bulsho ah, waxey noqonaysaa: in ay ku sameeyaan kormeer hawlaha mashruuca ee la higeliyay iyo sida ay u kala horeeyaan. Hawlaha mashruuca ee heer bulsho , waxa si toos ah loo marin doonnaa Guddiga Horumarinta Xaafada ee jira, haddii ay suurtagal tahay. Mashruuca GW4R, wuxuu si mug leh uuga tusaale qaadanayaa Mashruuca Biyoole ee uu maalgeliyay Bangiga Adduunka, kaas oo u suurtagelinaya dawlada in ay horumuud ka noqoto hurumarka ay bulshadu horseed ka tahay ee wadanka.

25. **Abaabulka bulshada iyo qorsheynta.** Hay'adaha heer bulsho ayaa hogaamin doona aqoonsiga iyo mudnaanta maalgashiga qaybta biyaha ,kaas oo hoos imaanaya baaxada GW4R ta. Guddiyadan (maxali iyo kuwa heer degmo), waxay mas'uul ka ahaan doonaan hawlgelinta, maarayta, iyo dayactirka qaab dhismeedka hadba say degmooyinkooda ugu kala yaalaan/ heerarka bulshada. Sidoo kale, tani waxa ka mid noqonaya dhisidda kaabayaasha dhaqaale (ceelasha gacanta lagu qoday iyo kuwa si macmal loo duleeliyay oo ay sameeyeen ganacsatada deegaanka). Guddiyadani waxay xaqiijin doonaan mathalaada kooxaha danyarta ah oo ay ka mid yihiin: kuwa laga tirade badanyahay, IDPs, haweenka, dhalinyarada iyo dadka naafada ah, iyadoo loo maraayo tirada ku habboon ee matalaada.

**1.3 Hadafyada iyo baaxadda ay saameyntiisu gaarayso/ SEP**

26. Ka qayb gelinta daneeyayaasha, waxaa loola jeedaa: habka wadaagista macluumaadka iyo aqoonta wax ku oolka ah. Ujeedada arintanina ay tahay in si guud oo ogaado, loona fahmo oo laga jawaabo welwelka shaqsiyaadka ama kooxaha laga yaabo in uu saameeyay mashruuca HOAGW4R, si daah furan, loo dhanyahay oo waqtigeeda ku haboon iyo dhisida xiriiro ku salaysan is aaminaad. Baaxada qorshaha ka

qayb galinta daneeyayaasha ayaa ka hadlaya Mashruuca ( HoA GW4R ) oo dhan FGS iyo shan dawlad gobaleed oo xubne ka ah federaalka Sidan oo kale, SEP waxaa ku jira

daneeyayaasha kala duwan, kuwaa oo si toggan, dhexdhexaad ah iyo si xun u saameeyay mashruuca

27. Ujeedada SEP, waa aqoonsiga iyo falanqeynta daneeyayaasha oo ay ku jiraan kooxaha danyarta, iyagoo qeexaya habka danahooda ay ula xiriiriyaan mashruuca, doonistooda , la tashigooda kaasoo ku habboon marxalad kasta uu marayo mashruuca.SEP waxaa kale uu qayaxayaa waqtiga iyo qaabka ay daneeyayaashu ay udooni karaan mashruuca iyo marxaladihiisa kala duwan. Daneeyayaashu waa umuhiim mashruuca. Daneeyayaashu wax ku oolka ahi, waxaa laga filan karaa in ay kor uqaadaan jiritaanka iyo adkeynta mashrruca ee deegaanka iyo bulshada, taas oo sahli karta si loo hormariyo naqshadeynta iyo hirgelinta mashruuca.

28. SEP, waa document nool oo la cusbooneysiiyo/wax laga badali karo inta ay wajiyada mashruuca socondoon, si loo ogaado hirgelinta hab xiriirka bulshada, saameynta ay daneeyayaashu ku leeyihiin iyo soo bandhigidda macluumaatka ee heerarka mashruuca kala giddsan. SEP , waxey si joogta ah dib u eegis ugu sameyn doontaa Mashruuca Qaranka ee FGS MoEWR, iyadoo lala shaqaynaayo Qeybaha Hirgelinta Mashruuca ee Dawlad goboleedka, gaar ahaa xubinta uq aabilsan arrimaha bulshada, khabiirka ilaalinta bulshada “Social Safeguard Specialist”

29. SEP waxaa loo diyaariyay si waafaqsan sharuudaha deegaanka iyo qaab dhismeedka bulshada ee Bangiga Adduunka ( ESF), qaas ahan ESS10 ee *hawlgelinta daneeyayaasha iyo soo bandhigida macluumaadka,* si lamid ah qoraaladan soo socda: “ la tashiga ddweeynaha iyo ka qayb galka daneeyayaasha uu taageero Bangiga Adduunku ( Word Bank-WB), iyadoo ay jiraan caqabado ku hor gudban qabashada shirarka dadweeyanaha” iyo ESF/Ilaalinta Qoraal ku Meel Gaar ah: “ tixgelinta COVID-19 ee dhismaha/ Mashaariicda Shaqo ee Bulsho”.

**Ujeedooyinka gaarka ah ee SEP waxaa ka mid ah :**

i. Fudadeynta xiriika/ wada hadal furan oo joogta ah iyo wada tashi u dhaxeeya qeybaha kala duwan ay ka mid yihiin: maareeyayaasha masharuuca, daneeyayaasha, iyo guud ahaan dadweeyanaha.

ii. Bixinta macluumaad ku habboon waqtigeeda, ka hor iyo xiliga hirgelinta mashruuca, si loo suurtageliyo ka qaybqaadasho ku saleysan xog ogaal-nimada mashruuca iyo tallaabooyin ku habboon yareynta khataraha iman kara.

iii. In uu gacan ka geysto sidii loo dhisi lahaa xiriir adag oo lala yeesho bulshada deeggaanka iyo in la yareeyo suurtagalnimada dib u dhac ku yimaada, iyadoo la sii bixinaayo tilmaamo hor-udhac ah, inta uu mashruuca socdo.

iv. Diwaangeli istiraatijiyada hawlgelinta dhabta ah, guulaha iyo casharada la bartay.

v. In lasiiyo daneeyayaasha hanaan cad oo ay ku bixiyaanka faalooyin iyo soo tabinta cabashooyinka.

vi. In loo ogalaado daneeyayaasha fursad ay ku soo tabin karaan faalooyinka/tabashada qarsoodiga, ayadoo la isticmaalaayo khadka teleefanka.

vii. In loo maareeyo , loo maamulo loona kormeero cabshooyinka iyo warbixinada si hufan oo wax ku ool ah.

viii. Si la hubiyo faalooyinkaas, jawaabahaas iyo cabashooyinkaas, si loogu maareeyo hab cadaalad ah, waqtigeeda aan dib uga dhicin, kuna salaysan,daahfurnaan, taas oo waafaqsan dhaqanka ugu wanaagsan ee caalamiga iyo filashooyinka Bangiga Adduunka ( World Bank-WB.

**1.3 Shuruudaha Bangiga Aduunka ee ka qeyb gelinta Daneeyayaasha**

30. Mashruucan waxaa lagu diyaarinayaa Qorshaha Ilaalinta Deeganka iyo Bulshada ee Bangiga Adduunka (ESF). Sida laga soo xigtay ESS10, ee ku saabsan ka qaybgalka daneyayaasha iyo shaacinta macluumaadka, deyn qaataha/hay'adaha fulinta, waxaa looga baahanyahay in ay siiyaan daneeyayaasha macluumaad mudaysan, ku haboon, la fahmi karo oo la heli karo iyo in lala tashaday si ku habboon, kaas oo xor ka ah isdabamarin, faragelin, handadaad, takoorid iyo cabsi gelin.

31. Ka qayb gelinta daneeyayaasha waa nidaam loo dhanyahay, lana fuliyay inta mashruucan uu soocdo. Marka si sax ah loo nashqadeeyo, loona hirgeliyo, waxey taageeraysaa horumarinta xiriir adag, oo wax tar leh iyo jawaab celin muhiim u ah maaraynta guulaysata ee halista deegaanka iyo bulshadaba. Ka qayb galinta daneeyayaasha mashruuca ayaa ah mid waxtar badan soo saara, haddii la bilaabo goor hore.

32. Shuruucda Bangiga ee ka qayb galka daneeyayaasha, khaas ahaan , shuruudaha laguu qeexay ESS10, waxay ka kooban yihiin mabaadii'da soo socota:

- Dawlada waxay la shaqayn doonta daneeeyayaasha inta mashruuca uu socdo, bilaabida ka qaybqaadashada ee sida ugu dhakhsiiyaa badan ee uguna macquulsan ee geedi socodka horumarka mashruuca, iyadoo waqti la siinayo wadatashiyo wax ku ool ah, oo lala yeesho daneeyayaasha xilliga naqshadeynta mashruuca. Nooca, xaddiga iyo inta jeer ee ay daneeyayaasha ka qayb qaadanayaan, waxay noqon doonaan kuwa u dhigma nooca iyo miisaanka mashruuca iyo saameynta khatarahiisa.

- Dawlada waxay la yeelan doontaa dhamaan daneeyayaasha wadatashiyo wax ku ool ah. Dawlada waxay si wakhtiyaysan u siin doontaa daneeyayaasha macluumaad ku habboon, la fahmi karo oo la heli karo. Sidoo kale, waxey ula tashan doontaa si haboon oo habdhaqan wanaagsan leh, kaasoo ka madax badaan wax is daba marin, faragelin, khasbid, takoorid iyo cabsi gelin.

- Geedisocodka ka qayb qaadashada daneeyayaashu, wuxuu ka koobnaan doonaa kuwa soo socda: (i) Aqoonsiga iyo falaqaynta daneeyayaasha; (ii) qorsheynta iyo hannaanka loo wajahayo daneeyayaasha (iii) soo badhigidda macluumaadka; (iv) la tashiga daneeyayaasha; (v) ka jawaabida iyo wax ka qabashada cabashooyinka; iyo (vi) warbixin siinta daneeyayaasha.

- Dawladdu way sii wadi doontaa, wayna soo bandhigi doontaa qiimaynta deegaanka iyo bulshada, diiwaan gelinta ka qayb qaadashada daneeyayaasha, oo ka mid tahay sharaxaad daneeyayaasha lagala tashtay, soo koobida ku saabsan jawaab-celinta la helay iyo sharaxaad kooban oo ku saabsan, sida: jawaab-celinta loo tix geliyay ama sababta aanan loo tixgelin.

- Dawlada waa in ay raadisaa aragtiyooyinka daneeyayaasha ku aadan SEP, ay ka mid tahay aqoonsiga daneeyayaasha iyo soo jeedinta hawgelinta mustaqbalka.

- “GRM” waa in ay soo jeediyaa habka xallinta cabashooyinka, si ay u hesho, kadibna u fududeeyso xallinta tabashooyinka iyo cabashooyinka ee mashruuca la xiriira, taasoo ku salaysan waxqabadka mashruuca uu leeyahay, deegaanka iyo bulshada ee waqtiyaysan.

33. Hadafka ESS10, sida ay qeexday WB ESF:

I) In la sameeyo habka nidaamsan ee ka qayb qaadashada daneeyayaasha, taa oo ka caawisa deyn qaatayaasha in ay aqoonsadaan daneeyayaasha, ayna abuuraan xiriir joogto ah oo haddana mirodhal ah,khaas ahaan qaybaha mashruuca uu saameeyay ama laga hirgeliyay.

II) In la qiimeeyo heerka daneeyayaasha mashruuca,laguna taageero aragtidooda la xiriira nashqadda mashruuca iyo wax qabadka deegaanka iyo bulshdada.

III) In la abuuro habab waxtar leh oo kor loogu qaadayo ka qaybqaadashada loo dhan yahay, ee ku aaddan dhinacyada uu mashruucu saamaynta ku leeyahay, inta mashruucu socdo, iyo waliba xaaladdaha saameynta leh ee mashruuca ku gaddaaman.

IV) In la xaqiijiyo macluumaadka deegaanka iyo khataraha bulshada kuwajahan ee mashruuca, si ku habboon iyo in saamaynta loo soo bandhigo daneeyayaasha ay ahaato mid la fahmi karo, la heli karo oo ku habboon dhankooda.

V) In la siiyo dadka mashruuca uu saameeyay hab ay ku soo gudbin karaan cabashooyinka, isla markaana looga jawaabo, loona maareeyo cabashooyinka noockasta oo ay ahaadaanba.

### 1.6. Sharciga iyo Xeerka Ku Meel Gaarka ee Khuseeya

34. Dastuurka ku Meelgaarka ee Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya ee 2012 ka, wuxuu qeexayaa helida macluumadka. Qodabka 32-aad ee Xuquuqda Helida Xogta, wuxuuqeexayaa in qof walbo uu leeyahay xuquuqda helidda macluumadka ay dawlada heyso; sidoo kale qof walba wuxuu xuquuq u leeyahay helida xog kasta, taasoo uu haayo qof kale oo looga baahan yahay ku dhaqanka ama ilaalinta xuquuq kasta oo kale.

## 2. HAWLAHA KA QAYBGALKA DANEEYAYAASHA OO KOOBAN

### 2.1 Warbixin Kooban oo ku saabsan hawlihii ka qeybgalka daneeyayaasha

35. Talooyinka nashqada mashruuca iyo shaqooyinka la qorsheeyay ayaa la qabtay, ayadoo lala kaashanaya daneeyayaasha muhiimka ah ee hay’adaha ay kamid tahay; dawladdaha ay khuseyso iyo hay’adaha fulinta, kuwa aan dowliga ahayn, saaxiibada horumarinta,haay’adaha gaarka loo leeyahay iyo jaamacadaha, sida lagu soo koobay shaxda 1-aad. Isgaarsiinta khadka ah ayaa la isticmaalay, marka la eegoo xaalada Covid-19 iyo kulanada .

36. Waxaa la filayaa in la samayn doono wadatashiiyo dheeraad ah, si loo helo fikradaha daneeyayaasha muhiimka ah ee wadanka, si loo ogeysiiyo geedi socodka ka qayb qaadashada

mashruuca.MOEWR-ka ayaa sii wadi doonta in ay ku howlanaadaan wadatashiiyo baaxad leh, oo ay la yeeshaan daneeyayaasha ku habboon, kuwaa soo aan ka xusi karno: dawlad-goboleedyada xubnaha ka ah federaalka (FMS), Maamulada degmooyinka ee meelaha mashruuca loo xushay, hogaamiyaasha bulshada, ganacsatada ganacsiga/gaarka loo leeyahay, saaxibada horumarinta, Qaramada Modoobay, hay'adaha bulshada rayidka, jaaamacadaha/kooleejyada iyo kuwa kale. Macluumaadka laga soo uruuriyay wadatashiyadan, waxaa loo isticmaali doonaa in lagu cusbooneeysiiyo SEP, sida ugu haboon

37. Wada shaqeynta mashaariicda kale ee uu maalgeliyo Bangiga Adduunka, gaar ahaan Mashruuca Biyoole ee Wax-soo-saarka Beeraha iyo Xoola-dhaqatada (P167826) 'WARP – Biyoole, si loo qaato casharro lagu ogeysiinayo naqshadeynta iyo hirgelinta mashruuca. Kooxda Mashruuca Biyoole ayaa ka qayb galay shirar iyo aqoon ku saabsan hawlaha diyaarinta mashruuca iyo qabanqaabada fulinta, kuwaas oo ka qayb qaatay naqshadaynta mashruuca iyo dukumentiyada ESF.

*Table 1:Wada-tashiyada daneeyayaasha oo kooban*

| **Goobta iyo Nooca Hawgalinta** | **Taariikhda** | **Ka Qayb Galayaasha** | **Arrimaha muhiimka ah iyo talooyinka lasoo jeeediyay ee E&S** |
|---|---|---|---|
| | | | |
| | | | |
| Daneeyayaasha Muhiimka ah | 11/11/21 | NGOs, Qaybta gaarka loo leeyahay, hay'adaha cilmi baarista, mashaariicda kale ee WB | Ka eeg warbixinta daneeyayaasha Lifaaqa 1-aad |
| **DOWLAD GOBOLEEDYADA XUBNAHA KA AH FEDERAALKA** | | | |
| **PUNTLAND** | | | |
| La tashiga wasaaradaha ay quseyso | 22/06/2021 | Madaxda Wasaarada Biyaha ee DG | Wada Hadal ku saabsan mashruuca lasoo jeediyay iyo doorka wasaaarada iyo habaynta xiriirada dawladaha u dhexeeya ee maaraynta mashruuca. |
| La tashiga Wasaarada Maaliyada (khadka ah) | 01/11/2021 | | Doorka Wasaarada ay ku leedahay Mashruuca |
| **GALMUDUG** | | | |
| La tashiga wasaarada ay quseyso | **19/06/2021** | Madaxda Wasaarada Biyaha ee oo ay wakiil ka tahay DG | • Wada hadal ku saabsan mashruuca la soo jeediyay<br>• Doorka wasaaarada iyo habaynta xiriirada dawladaha u dhexeeya ee maaraynta mashruuca. |
| La tashiga wasaarada maaliya khadka ah | 01/11/2021 | Madaxda Wasaarada Maaliyada (MoF) | Doorka wasaaradda Maaliyda (MoF) ee e Mashruuca |
| **SOUTHWEST** | | | |
| La tashiga wasaarada ay quseyso | 20/06/2021 | Madaxda Wasaarada Biyaha | Wada hadal ku saabsan mashaariicda la soo jeediyay iyo doorka wasaarada iyo xiriirada dawladaha u dhexeeya.<br>Qorshaynta ee maaraynta mashruuca. |
| La tashiga wasaarada Maaliyada | 01/11/2021 | Madaxda Wasaarada Maaliyada | Doorka wasaarada ee mashruuca |

| Goobta iyo Nooca Hawgalinta | Taariikhda | Ka Qayb Galayaasha | Arrimaha muhiimka ah iyo talooyinka lasoo jeeediyay ee E&S |
|---|---|---|---|
| **JUBALAND** | | | |
| La tashiga Wasaarada ay khuseyso | 17/06/2021 | Madaxda Wasaarada Biyaha | Wada hadal ku saabsan mashaariicda la soo jeediyay iyo doorka wasaarada iyo xiriirada dawladaha u dhexeeya.<br>Qorshaynta ee maaraynta mashruuca. |
| La tashiga wasaarada Maaliyada | 01//11/2021 | Madaxda Wasaarada Maaliyada | Doorka wasaarada ee mashruuca |
| **HIRSHABELE** | | | |
| La tashiga wasaarada ay quseyso | **17/06/2021** | Madaxda Wasaarada Biyaha | iyo doorka wasaarada iyo xiriirada dawladaha u dhexeeya.<br>Qorshaynta ee maaraynta mashruuca |

## 3.0 AQOONSIGA IYO FALANQAYNTA DANEEYAYAASHA

### 3.1 Daneeyayaasha mashruuca

**38.** Daneeyayaasha mashruuca waa shaqsiyaad, kooxo ama haay'ado kale, kuwaas oo uu saamaysay ama danaynaya mashruuca. Waa in la oogeysiiyaa, oo lagala tashadaa bulshada uu saameeyay mashruuca. Haday noqoto ka qaybqaadasho wax ku ool ah, daneeyayaasha mashruuca waa loo kala saaraa saddex koox oo muhiiim ah sida hoos ku qeexan.

a) **Kooxaha mashruucu saameeyay**: dadka, kooxo iyo hay'adaha kale ee jooga goobta mashruuca uu saaameeyay (PAI), kuwaas oo uu saameeyay mashruuca (si toosan ama si dadbanba, togan ama taban). Daneeyayaasha noocan oo kale ah, waxaa si toos ah u saameeyay mashruuca.

Mashruucan, qaybaha la saameeyay waa degmooyin, dawladaha hoose, bulshada iyo hay'adaha bulshada , ha ahaato si togan ama taban, kuwaas oo ay ka mid yihiin: kooxaha danyarta ah iyo kooxaha liita. Sidoo kale, bulshooyinka aan sida tooska ah loo abaarin, laakiin ku sugan meelaha biya galeenka ah. Kooxaha la saameeyay, sidokale waxaa ka mid ah hay'adaha farasamada loogu talagalay awood dhisidda ee hoos yimaada mashruuca. Qaybo badan oo mashruuca saameeyay ayaa la aqoonsan karaa, ayadoo mashruuca la hirgelinaayo iyo SEP oo lagu kordhinaayo maaacluumaad.

b) **Kooxaha Kale ee Xiiseeya (OIPs)**: Waxay ka koobanyihiin shaqsiyaad/kooxo/haay'ado, kuwaasoo danaynaya mashruuca, lehna awood saamayn ku leh natiijada mashruuca. Waxa laga yaabaa in OIP in aynan dareemin saaamaynta, si toos ama si dadban uga yimaada mashruuca,laakiin laga yaabaa in ay tixgeliyaan, mise dareemaan danohooda sida uu u saamaynaayo mashruuca.

c) **Kooxaha Dhibbataysan**: Dadka sida xad-dhaafka uu u saameeyay mashruucu, sababo ay ugu wacantahay tababar yari, ayaa waxey u baahan doonaan dedaalo khaas ah, si loo xaqiijo matalaadooda ee aaddan hababka wada tashiga iyo go'aaan gaarida mashruuca.

Kooxaha danyarta ah ee loo aqoonsaday mashruucan, waxaa ka mid ah Barakacayaasha gudaha (IDPs), kooxaha laga tirada badanyahay, qoysaska dumarka mas'uul ka yihiin, dadka naafada ah iyo kuwo kale.

## 3.2 Aqoonsiga Daneeyayaasha

39. Waxaa jira qaybo kala duwan oo dad iyo hay'ado iskugu jira, kuwaas oo uu si toosan u saamayn doona mashruuca iyo kuwa daneeya mashruuca ee ku sugan heerar kala duwan. Sidaa darted, waxa loo baahnaan doona in lagala tashado dadkaas, laguna hawgaliyo hawlaha mashruuca, sida lagu soo koobay shaxda 2-aad.

*Table 2: Qeexida Daneeyayaasha iyo Meelaha Xiisaha leh iyo Astaamaha Muhiimka ah ee ka Qayb Qaadashadooda.*

| **Daneeyayaasha** | **Sida ay udaneynayaan Mashruuca** | **Daneynta** | **Saameynta** | **Astaamaha muhiimka ah ee ka qeyb qaadashadooda** |
|---|---|---|---|---|
| **Qeybaha mashruuca uu saameeyay** | | | | |
| Bulshooyinka ka faa'ideysan doona maalgelinta isticmaalka qoyska, xoolaha la dhaqdo iyo beeraha ee kaabayaasha biyaha. | • Xissaha ka qayb qaadashado bulsho micno leh ee go'aanada mashruuca waxa kamid ah: nashqadaynta hawlaha mashruuca, aqoonsiga baahiyaha kaabayaasha biyaha dhulka hoostiisa ee mudnaanta leh iyo xulashooyinka goobta mashruuca.<br>• Ka qayb galka hirgelinta mashruuca.<br>• Faa'idada ugu badan ee ka imaaneysa hawlaha mashruuca, sidaa darted waxaa jiri doona adkeysi ku aadan Khakhal GELINTA cimilada..<br>• Xulida guddiga mashruuca bulshada dhisidiisa CECs ee heer bulsho, ee ka maran fara-gelin.<br>• Guddiga mashruuca bulshada waa la tababaray, oona loo fududeeyay si ay u gutaan doorarkooda kala duwan.<br>• Xubnaha bulshada, khaas ahaan kuwa danyarta ah iyo kooxaha dhiban, waxay ka qayb qaadan doonaan kormeerida mashruuca.<br>• Fursadaha shaqaaleysiinta ee hawlaha mashruuca, (tusale, shaqaalaha dhismaha, ilaada amniga, shaqoonyinka barakacayaasha gudaha, dhalinyarada, raga, dumarka iyo kooxaha kale oo dhiban leh aqoonta loo baahanyahay iyo xirfadooyinka maaraynta mashruuca. | sareeya | Sareeya | Badanaa jaahilka, gaar ahaan dadka nugul iyo dayacan, had iyo jeer ama inta badan ma heli karaan isticmaalka aaladdaha baraha bulshada si ay wax u soo gudbiyaan, badanaa ragga ayaa go'aanka iska leh.<br><br>Laga yaabaa in aynan haysanin wakhti ama agab ay kaga qayb qaataan shirarka, mise laga yaabaa in ay rajeynayaan dhiiragelin. |
| Madaxda iyo shaqaalaha | • MOEWR si micno leh ayaa loola hawlgeliyay saaxiibada ee dhamaan | sareeya | Sareeya | |

| Daneeyayaasha | Sida ay udaneynayaan Mashruuca | Daneynta | Saameynta | Astaamaha muhiimka ah ee ka qeyb qaadashadooda |
|---|---|---|---|---|
| Wasaaradda Tamarta, Biyaha iyo Kheyuraadka Heer Federaal | xaaladaha mashruuca laga bilaabo nashqada mashruuca ilaa intuu jiro mashruuca.<br>• Awooda shaqaalaha in la dhiso si hufan oo wax ku ool ah<br>• Bulshada waxey ka faa'ideysataa mashaariicda kuwaasoo kobcinaya sharciyada dawladda.<br>• Shuruucda qaran ee biyaha dhulka hoostiisa, siyaasad iyo ficillada maamulka ayaa la horumariyay iyo/ mise dib loo habeeyay maaraynta biyaha dhulka hoostiisa iyo isticmaalka si hufan.<br>• Isku duwida u dhaxaysa dawladda iyo dawlad-goboleedyada xubnahah ka ah federaalka ayaa loo sameeyay si daah furan iyo si isla xisaabtan leh, oo hay'adeed iyo daacadnimada shaqeyneysa ee heerka dawladnimo.<br>• Mabaadii'da hawlgalinta ayaa la dhawray dhamaan xaaladaha wadatashi ee heerarka kala duwan-FGS, FMS iyo heer degaanba.<br>• Taasi waxay awoodi doontaa suurtagalnimada maaraynta deegaanka iyo halista bulshada iyo saamaynta si lamid ah caafimaadka bulshada iyo badbaadada.<br>• Waxay awoodi doonaan in ay maarayaan si ay u gaarsiyaan goor caqabado amni ay jiraan. | | | |
| Madaxda Wasaaradda ee mas'uulka ka ah Biyaha ee heer Dawlad Goboleed | • Kala qayb qaadasho macno leh oo habeysan ee FGS dhamaan dhinacyada mashruuca laga soo bilaabo nashqada mashruuca iyo inta lagu jiro fulinta.<br>• Awooda shaqaalaha ayaa la dhisay si loo gaarsiiyo mashruuca si hufan.<br>• Bulshooyinka waxay ka faa'idaan mashaariicda, tasoo sare u qaadaysa sharciyada dawlada.<br>• Shuruucda biyaha dhulka hoostiisa ee FMS, siyaasada, ficilada maamuleed ayaa la horumariyay iyo/mise dib loo habeeyay maareynta biyaha dhulka hoostiisa iyo isticmaalka si hufan.<br>• Isku duwida u dhaxaysa dawlada iyo dawlad goboleedyada xubnahah ka ah federaalka, ayaa loo sameeyay si daah furan iyo si isla xisaabtan leh, oo hay'adeed iyo daacadnimada shaqeyneysa ee heerka dawladnimo.<br>• Mabaadii'da hawlgalinta ayaa la dhawray dhamaan xaaladaha wadatashi ee heerarka kala duwan-FGS, FMS iyo heer degaan.<br>• Maaree halista macquulka ah ee deegaanka iyo bulshada iyo saamaynta si | sareeya | Sareeeya | |

| Daneeyayaasha | Sida ay udaneynayaan Mashruuca | Daneynta | Saameynta | Astaamaha muhiimka ah ee ka qeyb qaadashadooda |
|---|---|---|---|---|
| | lamid ah caafimaadka bulshada iyo badbaadada.<br>• Waxay awoodi doonaan in ay maareeyaan, si ay dhexdooda uga saaran caqabaddaha amni ee jira | | | |
| Wasaaradaha kale ee heer FGS and FMS (tusale, maaliyada, deegaanka iyo khayraadka dabiiciga iyo dhulka, shaqada iyo adeega bulshada ay ka mid ah iyo degmooyinka | • Mabaadii'da ka qaybgalka ayaa lagu dhawraa dhamaan dhinacyada wada-tashiga ee heerarka kala duwan.<br>• Macluumaadka waxaa lala wadaagaa wakhti ku habboon iyo jawaab-celintana, waxaa loo isticmaalayaa in lagu wargeliyo ka qayb-galka dheeradka ah ee mashruuca.<br>• Cadaynta shuruucda ka qayb-galka iyo doorka wasaarada ayaa la bixiyay bilowgii mashruuca. | dhexdhexaad | dhexdhexaad | |
| **Dhinacyada kale ee danaynaya** | | | | |
| CBOs, CSOs, NGOs, ka howlgalaya degmooyinka iyo heerka hoose oo ku lug leh biyaha iyo horumarinta mashaariicda. | • In ay helaan macluumaad ku saabsan mashruuca oo ayna si wakhti ku habboon u bixiyaan jawaab-celinta khaas ahaan arrimaha is dul saran.<br>• Waxaa jirta daah furnaan iyo isla xisaabtan dhamaan dhinacyada ka qayb-galka<br>• Mabaadii'da ka qaybqaadashada loo dhanyahay, ayaa la ilaaliyay dhamaan qaybaha wadatashiga.<br>• Taas in ay la waagi doonaan aqoontooda ee goobaha mashruuca, deegaanka iyo bulshada, si loogu faa'ideeyo mashruuca.<br>• Waxay ka faa'idi karaan khibrada farsamada iyo casharada laga bartay mashruuca. | dhexdhexaad | dhexdhexaad | Laga yaabaa in aynan haysan wakhti mise kharashaad lagaga qayb qaato, (khaas ahaan CSOs ka deegaan, kuwaasoo laga yaabaa in ay haystaan maalgelin xaddidan). |
| Saaxiibada Horumarinta iyo Hay'adaha Qaramada Midoobay ee ku hawlan biyaha iyo is-bedelka cimilada iyo aaggaga adkaysiga | • Faa'idada laga helo Khibrada farsamo iyo casharada laga bartay mashruuca.<br>• Si loo siiyo casharada laga bartay shaqadooda gaarka ah si loogu faa'ideeyo mashruuca.<br>• Si sare loogu qaado siyaasado horumarsan iyo istiraatijiyooyin laga yaaba in uu taageeray mashruuca.<br>• Waxaa loo danaynayaa isku duwida ee horumarinta shaqada iyo in la dhiso xiriir iyo iska ilaalinta nuqul ka samaynta/si aan sharci ahayn u badinta qoraalada ama dadaalada. | dhexdehexaad | dhexdhexaad | Diyaar u ah in ay wax ku daraan, laakiin mar walba ma fahmaan aragtida bulshada, khaas ahaan meelaha fog mise kooxaha calaf darsaday. |
| Ganacsiga Bulshada iyo Qandaraaslayaasha | • Waxaa lagu abaal marin doonaa qandaraasyo si ay u bixiyaan hawlo khaas ah ee kaabayaasha biyaha dhulka hoostiisa ah/ mise ay u bixiyaan adeegyada mashruuca. | dhexdhexaad | Hooseeyua | |

| Daneeyayaasha | Sida ay udaneynayaan Mashruuca | Daneynta | Saameynta | Astaamaha muhiimka ah ee ka qeyb qaadashadooda |
|---|---|---|---|---|
| | • Waxaa jiri doona hanaan qandaraas oo daah furan ee hawlaha iyo adeegyada qandaraasyada.<br>• Waxay awood u yeelan doonaan in ay maaareyaan khataraha suurta galka ah ee deegaanka iyo bulshada iyo saamaynta sidoo kale caafimaadka bulshada iyo bad qabka.<br>• Waxay awood u yeelan doonaan in ay maareeyaan si loo gaarsiiyo goor ay jirto caqabado amni. | | | |
| Machadyada tacliinta, (tusaale, jaamacadaha, koox khabiiro ah) | • Waxey xiisayn doonaan in ay heelaan taageero dhaqaale ee tababar iyo cilmi baaris ku saabsan mowdhuucyada la xiriira.<br>• Waa loo wici doona si ay u bixiyaan aqoon farsamo iyo khibrad ku saabsan biyaha dhulka hoostiisa/ceelasha iyo moowduucyada la xiriira.<br>• Tabashooyin ka imaan kara saamaynta deegaanka iyo bulsho ee mashruuca. | dhexdhexaad | dhexdhexaad | |
| Warbaahinta (daabacaadda iyo eletarooniga) shabakadaha isgaarsiinta onlaynka ah. | • Hel oo la wadaag macluumaad sax ah oo ku saabsan mashruuca.<br>• In la helo marin cad ee xogta ka socata kooxaha mashruuca.. | hooseeya | sareeya | |
| **Kooxaha Danyarta ah** | | | | |
| Dumarka iyo dhalinyarada | • In mashruuca ka qayb-galin doono hababka go'aan gaarida ee mashruuca la xiriira, si looga guuleysto caado dhamaqmeedyada taas oo dib u dhac ku keentay ayaga ee dhinacyada go'aan qaadashada. Tusaale, ayagoo lagu daraayo guddiga bulshada.<br>• Qoysaska ay hogaamiyaan raga iyo dumarka ayaa sidoo kale ka faa'ideeysan doona mashruuca. | Sareeya | Hooseeya | |
| IDPs | • In goobaha ay ku noolyihiin aan laga tagin mashruuc hoosaadka, marka la dooranaayo, ee la xaqiijinaayo in lagu matalo guddida.<br>• Waxay ka faa'idaan mashruuc hoosaadyada iyo waxay cod ku leeyihiin go'aan gaaridda. | Sareeya | hooseeya | |
| Kooxaha laga tirada badanayahay | • In goobaha ay ku noolyihiin aan laga tagin mashruuc hoosaadka marka la dooranaayo, ayadoo la xaqiijinaayo in lagu matalo guddida.<br>• Waxay ka faa'idaan mashruuc hoosaadyada iyo waxay cod ku leeyihiin go'aan gaaridda. | Sareeya | hooseeya | |
| Xoolo dhaqatada reer guuraaga ah | • Xoolahooda ayay biyo u rabaan, laakiin sidoo kale waxay rabaan dhulkooda daaqa in la ilaaliyo. Tusale, ma jirto goob daaqsimeed,taas oo xilliga roob la'aanta | sareeya | hooseeya | |

| Daneeyayaasha | Sida ay udaneynayaan Mashruuca | Daneynta | Saameynta | Astaamaha muhiimka ah ee ka qeyb qaadashadooda |
|---|---|---|---|---|
| | leh ilaha biyaha joogto ah, arintaasina waxay sabab u noqon kartaa nabaadguur iyo qax.<br>• In ay jiri doonto maalgashi kaabayaasha ku yaala meelaha iyo goobaha istiraatijiga ah, si loo xoojiyo adkaysiga.<br>• Ayadoo ay ugu wacantahay guurguuritaankooda, waxay seegi/ka maqnaan karaan haanaanka wadatashiga bulshada. Dedaal ku talagal ah oo ay samaynayaan kooxaha mashaariicda, ayaa lagu aqoonsan doonnaa deegaaanada ay ku nool yihiin, si loo dejiyo qaabka ugu haboon lagu gaari, iyo qalabka/jidka saacidaya ayaa la samayn doonaa. | | | |
| Dadka Laxaadka La' (PLwD) | • Mashruuca wuu garowsan yahay xaqiiqda caqabadaha ay wajahaan dadka laxaadka leh,(PLWD), si ay u helaan maclumaadka mashruuca ay ka mid yihiin; xaqiijinta qaababka/qalabka loo isticmaalay in lagu gaarsiiyo uu yahay mid fudud oo la heli karo.<br>• In mashruucu uu ka qaybgeliyo , lagana tashado hababka go'aan gaarida.<br>• In mashruuca uu wax ka qabto baahiyahooda mudnaanta leh, sida: ka qayb ahaan bulshooyinka bartilmaadka u ah mashruuca). | sareeya | hooseeya | Laga yaabaa in ay bulshadu ceebayso dadkan laxaadka la', oo aynan kusoo dhawaynin shirarka mise aynan u ogolaanin in ay isku wakhti biyo helaan/shubtaan. . Waxaa muhiim ah, in baahidooda helidda biyaha, si fiican loo maareeyo, lana siiyo matalaad go'an, intii ay maqnaan lahaayeen. |

### 3.3 Mabaadii'da ka Qeybgalka Daneeyaha

40. Falanqaynta daneeyaha waxey soo saartaa macluumaad ku saabsan fikradaha, daneynta, baahiyaha iyo saamaynta jiliyaasha mashruuca. Aqoonsiga qaab ku habboon wadatashiga daneeyaha, ayaa muhiim ah inta uu jiro mashruuca, waana arin lagama maarmaan ah. Si loo haleelo hababka dhaqanka/isticmaalka wanaagsan, mashruuca ayaa adeegsan doona mabaadii'dan soo socota ee ka qaybgalinta daneeyaha:

- Furfurnaan iyo habka giraanta nolosha mashruuca ( Life sycle approach): latashiiyo dadweyne ayaa socon doonta xilliga mashruuca, laga bilaabo diyaarinta ilaa hirgelinta. Ka qayb qaadashada daneeyayaashu, waxay noqon doontaa mid ka xor ah wax-isdabamarin, faragelin, qasbidd iyo cabsi gelin.
- Ka qeyb-qaadashada macluumaadka mashruuca iyo falcelinta: Macluumadka ayaa loo shaacin doonaa si baahsanna, waa loogu qaybin doonaa dhamaan daneeyayaasha qaab ku haboon; ayadoo lagu salaynaayo wakhtiga ku habboon oo la fahmi karo
- Iskudarka iyo Dareenka: Aqoonsiga daneeyayaasha ayaa la samayn doonaa, si loo taageero is-gaarsiinta wanaagsan iyo dhisida xiriir wax ku ool ah. Habka ka qayb qaadashada ee mashruuca wuxuu noqon doonaa mid loo dhanyahay. Dhamaan daneeyayaasha waxaa lagu dhiiragelin doonaa in ay ka qayb qaataan hababka wadatashiga. Helida macluumadka oo loo simanyahay ayaa la siin doonaa dhamaan daneeyayaasha.Dareen in loo lahaado baahiyaha daneeyayaasha

ayaa ah mabda’a ugu muhiimsan ee hoos imaanaya xulashada hababka ka qayb galka. Fiiro gaar ah ayaa la siin doonaa kooxaha liita iyo kuwa danyarta ah, ayadoo la tixgelinaayo dareenka dhaqankooda.

- Ka qaybqaadasho micna leh: Xubnaha bulshada ayaa laga qayb galin doonaa nashqadeynta hawlaha mashruuc hoosaadka, aqoonsiga goobaha iyo kormeeridda hawlaha mashruuca, si kor loogu qaado fursadaha guusha mashruuca iyo si loo horumariyo aqbalaadda mashruuca iyo lahaanshaha.
- Habka falcelinta dareenka jinsiga ku salaysan: Awood-siinta haweenka iyo sinnaan la'aanta jinsiga ee dhanka hanaanka go’aamintu , waa mid farqi weyn u dhexeeyo, waana muhiim in la tixgeliyaa maanta. Daneeyayaashu waa in ay xaqiijiyaan ka qaygalka dumarka ee dhanka go’ aan qaadashada. Kulanada talooyinku waxay xoogga saari doonnaan, doodo gaar ah oo la xiriira hoggamiyaasha dumarka, siiba kuwa meesha laga saaray ee aan talada laga qaygalin, iyo kuwo la shaqeeya gabdhaha yaryar (Wiilaal iyo gabdho) iyo kooxaha kale ee ku sugan khatarta. Hoggaanka dumarka waxa lagu dhiirigelin doonaa in ay fududeeyaan kulamada talooyinka marka ay suurtagal tahay.
- Mareeynta khataraha amniga: Iyada oo ay jiraan khataro amni oo aad ugu faafay bulshooyinka Soomaaliyeed, qandaraaslayda, iyo shaqaalaha mashruuca,ayaa haddaba ayaa si taxaddaran loo qiimayn doonaa loona maareyn doonaa. Isticmaalka xogaaga amni xilliga safarka ayaa la samayn doonaa, iyada oo la waafajinaya qoraalka hab-dhaqanka wanaagsan ee Bangiga Adduunka, oo ku saabsan qiimaynta iyo maaraynta khataraha jira.

## 4.0 QORSHAHA KA QAYBGALKA DANEEYAYAASHA

### 4.1 Barnaamijka Ka qaybgalka Daneeyayaasha

41. Ka qaybqaadashada daneeyaha waa hab loo dhanyahay oo lagu wada jiro, taas oo ay qasab tahay in la fuliyo inta mashruuca uu jiro. Barnaamijkan wuxuu dulmar ku sameyn doonaa: Ujeedka iyo waqtiyaynta; istiraatijiyad lasoo bandhigay oo xambaarsan, shaacinta macluumadka (goorta iyo sida); istiraatijiyadda loo soo bandhigay ee wadatashiga (marinada ay tahay in la isticmaalo, iyo inta jeer); istiraatijiyada la soo jeediyay, si loogu daro fikrada kooxaha nugul; waqtiyada jadwalka; dib u eegista faalloyinka iyo marxaladda mustaqbalka ee mashruuca. Shaxda 3-aad, waxay soo bandhigeysaa hawlaha ka qaybqaadashada daneeyaha ee muhiimka ah, inta lagu guddo jiro marxalada diyaarinta, hirgelinta iyo ilaa xiritaanka mashruuca.

***Shaxda 3: Habka Wadatashiga ee Daneeyayaasha***

| Marxaladaha Wadatashiga | Ka Qaybgalayaasha talinta Mashruuca | | Habka Wadatashiga | Natiijada la Filaayo |
|---|---|---|---|---|
| | Maamulka Mashruuca | Daneeyayaasha iyo ka faa'idaystayaasha mashruuca, oo ay kamid yihiin shaqsiyaadka danyarta ah iyo kooxaha. | | |
| Wadatashi ku saabsan diyaarinta dukumeentiyada mashruuca ee qoraal-fikirka ( concept note) iyo qiimaynta | • Hoggaaminta MOEWR iyo shaqaalaha farsamada.<br>• Hirgelinta mashruuca/qaybaha isku duwida.<br>• Lataliyayaasha mashruuca, (Khubaro farsamo, Khabiirada maaraynta mashruuca, ilaalada bulshada iyo deegaanka, khabiirada maaliyadda iyo soo iibinta.<br>• Dawlad Goboleedyada xubnahaha ka ah federaalka, wasaaraddaha, waaxyaha iyo haay'adaha. | Qaramada Midobay, Ururada Bulshada (CSOs), Saaxiibada horumarinta, iyo jaamacadaha | • Kulamada hal-hal ah.<br>• Aqoon is-waydaarsiga khuseeya qaybqaadashada daneeyayaasha.<br>• Kulan khadka ah ayadoo la isticmaalaayo WeBex, Skype/Zoom/Teams, iyo wax lamid ah.<br>• Kulamo fool ka fool ah (SPIU ayaa qiimayn doonta xaalada Covid-19 ee la xiriirta kulamada tooska ah iyo sidoo kale waxay hagid ka qaadan doontaa tilmaamaha Covid-19 ee Dawlada ee Qoraalka Farsamada ee latashiga Dadwaynaha ee WB). | • Ka qaybqaadashada horumarinta mashruuca iyo hababka loo dhanyahay.<br>• Casharadii laga bartay yaraynta khataraha bulshada iyo deegaanka iyo saamaynta lagu tix geliyay nashqada mashruuca.<br>• Heshiis ku saabsan ka faa'idaystayaash]a bartilmaameedka u ah mashruuca iyo hay'adaha hirgelinta.<br>• Shaqaalaha waxaa lagu tababaray/wacyi geliyay qalabka iyo hababka bangiga adduunka.<br>• Hel fahan hordhac ah oo ku saabsan baaxada mashruuca, siyaasadda ku habboon,sharciyada loo baahanyahay iyo daneeyayaasha ay khusayso. |
| La tashiga kadib ansixinta mashruuca iyo waxtarnimadiisa | • Hogaanka MOEWR iyo shaqaalaha farsamada. | • FGS -MDAs<br>• FMS-MDAs<br>• Daneeyayaasha kale hirgelinaya | • Kulan khadka ah, ayadoo la isticmaalaayo WeBex, Skype/Zoom/Teams. | • Wacyigelinta lagu abuuray nashqada mashruuca iyo tallaabooyinka yaraynta ee E&S. |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | • Hirgelinta mashruuca/qaybaha isku duwida.<br>• La Taliyayaasha mashruuca (Khubaro farsamo, Khabiirada maaraynta mashruuca, ilaalada bulshada iyo deegaanka, khabiirada maaliyadda iyo soo iibinta.<br>• Dawlad Goboleedyada xubnahaha ka ah federaalka, wasaaradaha, waaxyaha iyo hay'adaha | mashaariicda la xiriirta. | • Kulamo fool ka fool ah (SPIU ayaa qiimayn doonta xaalada Covid-19 ee la xiriirta kulamada tooska ah, waxayna hagid ka qaadan doontaa tilmaamaha Covid-19 ee Dawlada eek u jira/ka imanaya Qoraalka Farsamada ee la Tashiga Dadwaynaha ee WB).<br>• Ku darista arrimaha iyo cashsrada la bartey bug-gacmeedka Shaqada mashruuca | • Dhamaan daneeyayaashu in ay joogaan/xaadir ahaadaan.<br>• POM waxay faahfaahinaysaa habka talada loo dhan yahay iyo maareynta khataraha la xiriira E&S.. |
| Xulashada iyo xaqiijinta goobaha/meelaha hadda jira iyo kuwa cusub ee mashruuca. | • Kooxda mashruuca NPCU/SPIU<br>• Lataliyayaasha mashruuca | • Ururada Bulshada (CBOs,)<br>• Hogaamiyaasha/od ayaasha bulshada. | • Ogeysiisyada dadweynaha<br>• Kulamo fool ka fool ah (SPIU ayaa qiimayn doonta xaalada Covid-19 ee la xiriirta kulamada tooska ah, waxayna hagid ka qaadan doontaa tilmaamaha Covid-19 ee Dawlada eek u jira Qoraalka Farsamada ee latashiga Dadwaynaha ee WB).<br>• Kulan khadka ah ayadoo la isticmaalaayo WeBex, Skype/Zoom/Teams. | • Xulasho ku haboon goobaha mashruucya oo kusalaysan baahida jirta iyo sinnaanta. Khatarta E&S ayaa la aqoonsaday, lana yareeyay/maareeyay.<br>• Qiimaynta koowaad ee aragtida dadka deegaanka ee aaddan suurtagalnimada faa'idoonyinka iyo halisaha ka iman kara mashruuca.<br>• Lahaanshada bulshada iyo waaristeeda/sii jiritaankeeda.<br>• Guddiyo loo dhan yahay ayaa loo sameeyay mashruuca. |
| Baaritaanka mashruuc hoosaadka mashaariicda ee lasoo jeediyayay. | Khabiirada deegaanka iyo bulshadada iyo kooxda farsamada ee SPIU, | • Koohaha la saameeyay, waxay ka koobanyihiin: IDPs, kooxaha laga tirada badanyahay, Xoolo-dhaqatada guurguurta, dumarka, PLWDs iyo wixii la mid ah.<br>• Ururada Bulshada (CBOs)<br>• Hogaamiyaasha/od ayaasha bulshada<br>• Xog-ogogaalyaasha/Xog ogaalka muhiimka ah | • Ogeysiisyada dadweynaha<br>• Kulamo toos ah (ayadoo la adeecaayo tilmaahaha/hagayaasha a dawlada ee ku sabsanCovid-19.) | • Aqoonsashada halisaha iyo maaraynta E&S, si loo xoojiyo hirgelinta mashruuca. |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| ESMPs: Daraasaad qotodheer oo ku saabsan khataraha iyo faa'iidooyinka, ayadoo la tix gelinaayo, kuwa xaaladaha sababay ama hoggaaminaya is afgaradaka bulshada. | • NPCU/MoEWR<br>• Lataliyayaasha mashruuca<br>• Khabiirada bulshada<br>• Saraakiisha kale ee dawlada ee aqoonta leh. | • Wuxuu saamayn karaa shaqsiyaadka iyo kooxaha.<br>• Ururada Bulshada iyo ururada aan dawliga ahayn (CBOs/NGOs) ee deegaanka ku salaysan<br>• Bulshada<br>• Hogaamiyayaasha/ odayaasha<br>• Dadka xog-ogogaalka ah. | • Kulamo sarmi ah/aan rasmi ahayn<br>• waraysiiyo<br>• Dood kooxeedyo diiradda arin gaar ah la saarayo (FGDs)<br>• SPIU ayaa qiimayn doonta xaalada Covid-19 ee la xiriirta kulamada tooska ah,waxay hagid ka qaadan doontaa tilmaamaha Covid-19 ee Dawlada , ee ku jira Qoraalka Farsamada ee la Tashiga Dadwaynaha ee Bangiga Adduunka (WB).<br>• Dood ku saabsan saamaynt khaaska ah, bedelaadyo, iyo dhimid iyo wixii la mid ah. | • Qorshaha adag ee E&S, maamul iyo waajibaadka cad ee mashruuca shaqaalaha iyo qandaraaslayaasha Clear documentation of community agreements and consultation processes.<br>• Diiwaangelin cad oo lagu sameeyo heshiisyada iyo hanaanka talooyinka ee bulshada. |
| Hirgelin | • NPCU(khabiirada bulshada)<br>• Lataliyayaasha mashruuca<br>• Federal, FMS, Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha | • Shaqsiyaadka iyo kooxaha danyarta ah<br>• Bulshada iyo kooxaha bulshada<br>• Hogaamiyaasha/odayaasha iyo daneeyayaasha kale<br>• Ururada aan dawliga ahayn iyo Ururada Bulshadu leedahay (NGOS/CBOs). | • Hirgelin<br>• Kormeerka<br>• Guddiyo (rasmi mise rasmi ahayn), kulamo toos ah. (SPIU ayaa qiimayn doonta xaalada Covid-19 ee la xiriirta kulamada tooska ah, waxayna hagid ka qaadan doontaa tilmaamaha Covid-19 ee Dawlada, ee ku jira Qoraalka Farsamada ee la Tashiga Dadwaynaha ee WB).<br>• Ogaysiisyada dadwaynaha<br>• Isticmaalka daabacaada iyo elekirooniga ee warbaahinta | • Yaraynta iyo maaraynta khataraha bulshada iyo deegaanka, taas o oleh waajibaad cad.<br>• Xal degdeg ah ee arrimaha iyo cabashooyinka<br>• Hirgelin hufan ee qorshaha ka qayb galinta<br>• Macluumadka ku saabsan horumarka mashruuca waa lasoo gudbiyay.<br>• Fikradaha iyo aragtida ee ka faa'idaystayaasha bulshada oo ku saabsan mashruuca iyo hormarkiisa ayaa la helay. |
| Kormeerka iyo Qiimaynta | • NPCU and SPIU (khabiirada bulshada)<br>• Lataliyayaasha | • Dadka xiisaynaya iyo kuwo uu saameeyay mashruucu, kuwaas oo ay ku jiraan danyarta.<br>• NGOs & CBOs | • Ka qaybgalka rasmiga ah ee dib u eegista iyo kormeerka doodaha.<br>• Doodaha Kooxaha Diiirada Lagu saaro mawduuc gaar ah (FGD).<br>• SPIU ayaa qiimayn doonta xaalada Covid-19 ee la xiriirta kulamada tooska ah, waxay hagid ka qaadan doontaa tilmaamaha Covid-19 ee Dawlada ee Qoraalka Farsamada ee | • Aqoonsiga iyo xallinta arrimaha fulinta iyo cabashooyinka.<br>• Waxtarka SEP iyo qorshaha ka mid noqoshada.<br>• Natiijooyinka mashruuca ayaa la aqoonsaday, kaydiyay oo la sheegay/la faafiyay iyadoo la adeegsanaayo luuqada iyo hababka ay heli karaan daneeyayaasha oo ay |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | | | latashiga Dadwaynaha ee Bangiga Adduunka ( WB).<br>• Su'aalaha<br>• Waraysiyo<br>• Kulan khadka ah, ayadoo la isticmaalaayo WeBex, Skype/Zoom/Teams. | kamid yihiin kuwa danyarta ah. |

## 1.2 Shaacinta Macluumaadka Mashruuca

42. Macluumaadka ayaa la uruurin doonaa,kadibna lala wadaagi doonaa daneeyayaasha muhiimka ah, ayadoo la isticmaalayo habab kala duwan. NPCU-da ayaa masuul ka ahaan doonta xaqiijinta arintaas, si uu macluumadka u gaaro daneeyayaasha waqti ku habboon, iyadoo loo maraayo jidka ugu sahlan, uguna fudud.Jawaab- celinta daneeyayaasha ayaa la eegi doonaa, loona fiirsan doonnaa horumarka ay samaynayaan, si loo xaqiijiyo qulqulka macluumaadka xoogan oo joogtada ah. Shaxda 4-aad, waxey soo bandhigaysaa,soona koobeysaa macluumaadka la shaaciyay ee mashruuca. SEP-ta, waa dukumiinti nool(Waxna lagu dari kaor, waxna laga badali karo). Tusaale, waxa laga yaabaa oo dhici karta , la casriyeynkaro ama la bedeli karo,iyadoo la raacaayo maalgelinta iyo fikradaha daneeyayaasha mashruuca.

*Shaxda 4-aad: Shaacinta macluumaadka mashruuca ee heerarka kala duwan ee wareeggamashruuca.*

| Macluumaadka la shaacinaayo | Habka la isticmaalay | Daneeyayaasha bartilmaameedka ah | Masuuliya daha | Deegaanka |
|---|---|---|---|---|
| **Qiimaynta ka hor** | | | | |
| • Dukumiintiyo qabyo ah ayaa lala wadaagay daneeyayaasha muhiimka, si ay uga soo jawaba-celiyaan faalooyinkooda ku saabsan aqoon isweydarsiga la tashiga daneeyayaasha<br>• Shaacinta dukumiintiyada mashruuca (PAD, ESMF, RPF, SEP, ESCP) | • Mareegyo - MoEWR iyo WBG<br>• Aqoon isweydaarsiga daneeyayaasha ee khadka.<br>• Soo koobid fudud oo ku saabsan waxyaabaha muhimka ah ee mashruuca SEP | Dhamaan daneeyayaasha muhiimka ah | • MOEWR NPCU | Heer Qaran/ Maamul Goboleed |
| **Qiimaynta ka dib** | | | | |
| Xayeeysiinta ogolaanshaha mashruuca iyo qorshaha horumarinta | • Aqoon iswaydaarsiga daneeyayaasha ee FMS<br>• Fariimaha maqal-araga ee mashruuca.Sida Macluumaadka (raadiyaha, TV-ga oo ku baxaya luuqadaha dadka deegaanka oo kala duwan).<br>• Sheekooyinka wargeysyada iyo kuwa soo raaca<br>• Waxyaabaha la daabacay oo ku saabsan macluumaadka mashruuca | Dhamaan daneeyayaasha muhiimka ah | • MOEWR NPCU<br>• Khabiirka isgaarsiinta<br>• Khubarada bulshada | Heer Qaran/Maamul Goboleed |

| Macluumaadka la shaacinaayo | Habka la isticmaalay | Daneeyayaasha bartilmaameedka ah | Masuuliyadaha | Deegaanka |
|---|---|---|---|---|
| | • Baraha Bulshada (Twitter, Facebook, Instagram, WhatsApp)<br>• iimeellada<br>• War-saxaafadeed<br>• khudbooyin<br>• Mareegaha (FGS and FMS, WBG) | | | |
| Shaacinta dhamaan dukumiintiyada mashruuca. Taas oo ay kamid tahay soo koobidda lagu sameeyay af Somaali (PAD, ESMF, RPF, updated SEP, LMP, GBV/SEAH Qorshaha Waxqabadka, Xeerarka Anshaxa (CoCs), ay kamid yihiin kuwo kale, ayadoo laga reebayo qiimaynta iyo maaraynta qorshaha iyo khatarta amniga. Dukumiintiyada la shaaciyay waxay bixin doonaan macluumaad cad oo ku saabsan xadgudub iyo waliba sida ay xadgudubka loo war geliyin karo. Macluumaadka ku saabsan GBV/SEAH, wuxuu ka koobnaan doonaa adeeg bixiyaasha GBV ee deegaanka, sidii loola xiriiri lahaa iyo adeegyada taageeroee la siiyay. | • Mareegaha - MOEWR iyo WBG<br>• Soo koobid kooban ee waxyaabaha muhiimka ee mashruuca SEP<br>• Fariimaha maqal-araga ee mashruuca (Raadiyo, TV oo kubaxa luuqado kala duwan)<br>• Sheekooyinka wargeesyada/kuwa soo raaca<br>• Baraha bulshada (twitter, Facebook, Instagram WhatsApp)<br>• Iimeelo<br>• Warsaxaafadedyo<br>• khutbooyin<br>• Shirarka bulshada<br>• Doodaha diirad saarka arimaha gaarka ah, ee ay ku jiraan kooxaha haweenka<br>• Diiradda Dood kooxeedka<br>• Fariimaha farabadan ee moobaylada | • MOEWR iyo dhamaan saaxiibada ku lug leh mashruuca<br><br>• Loo ogol yahay in ay heli karaan dhamaan qaybaha danaaynaya<br><br>• Horumarka iyo qaybinta warqadaha mashruuca ee daabacan. | • MOEWR NPCU<br><br>• Koxda Bangiga Adduunka (WBG) | Heer Qaran/ Dawlad Goboleed |
| **Xilliga Diwaangelinta** | | | | |
| Soo saarista hawlaha mashruuca. | • Wareysiyada muhiimka ah ee lala yeeshay daneeyayaasha muhiimka ah<br>• Doodaha bulshada (ayadoo loo maraayo kulan ka dadweynaha and kulamada wicitaanka raadiyaha),kuwaas oo ay ka mid yihiin baaritaanka, kor uqaadida wacyi gelinta ee ku saabsan SEAH iyo habka GM iyo Heshiisyada Isfahamka iyo heshiisyada dhulka oo lagu qoray | • Xubnaha bulshada ay ka mid yihiin, kooxaha tabarta daran iyo kuwa dhibaataysan.<br>• Waaxyaha dawlada<br>• Guddiga Bulshada ee Mashruuca<br>• Maamulada Jaamacadaha iyo kooleejyada. | • MOEWR NPCU<br>• Wasaaradaha Biyaha ee SPIUs/FMS<br>• Khabiirka isgaarsiinta<br>• Khubarada bulshada iyo | Heer Deegaan |

| **Macluumaadka la shaacinaayo** | **Habka la isticmaalay** | **Daneeyayaasha bartilmaameedka ah** | **Masuuliya daha** | **Deegaanka** |
|---|---|---|---|---|
| | warbixinnada ilaalinta ee kooban ee CESMPs<br>• ESIAs la daabacay, lana shaaciyay.<br>• Wargeysyada.<br>• Sheekooyinka wargeysyada iyo wixii soo raaca<br>• Baraha bulshada (twitter, Facebook, Instagram WhatsApp)<br>• Iimeelo<br>• Warsaxaafadeedyo<br>• khutbooyin<br>• Fariimaha farabadan ee moobaylada | • Guryaha warbaahinta | deegaanka<br>• Khubarada maaraynta mashruuca | |
| Waxyaabaha muhiimka ah ee mashruuca, horumarka, guulaha iyo casharada la bartay. | • Dib u eegid sanadeed ay weheliso tahay jawaab-celinta bulshada.<br>• Aqoon iswaydaarsi sanadeedka daneeyayaasha ee FMS IYO FGS<br>• TV-yada/Goobaha raadiyaha/firfircoonida iyo ogeysiisyada.<br>• Waxyaabaha la daabacay (wargeysyada iyo warqadaha xayaysiinta)<br>• Shirarka lagu qabto hoolasha magaalada<br>• Sheekooyinka wargaysyada iyo wixii soo raaca<br>• Baraha bulshada (twitter, Facebook, Instagram WhatsApp)<br>• iimeelada<br>• War-saxaafadeedyada<br>• Khudbooyin<br>• Fariimaha teleefoonka gacanta | • Dadka uu mashruuca saameeyay iyo hay'adaha iyo dhinacayada danaynaya<br>• parties<br>• World Bank | • MOEWR NPCU<br>• FMS NPCUs<br>• Khabiirada Bulshda | Heer Qaran/Dawlad Goboleed/Deegaan |
| Cabashooyinka/boggaadinta kusaabsan hirgelinta mashruuca iyo GBV/SEAH | • Diwaanka iyo warbixinta ka imaanaysa qofka wakiilka qaran ah ee GM.<br>• Goobaha ay wakiilada heer dawladgoboleed,deegaan ilaa degmo, kusoo gudbinayaan cabashooyinka ee xarumaha Federaalka.<br>• Adeeg bixiyaasha Rabshadaha ku salaysan Jinsiga (GBV). | • Helayaasha macluumadka iyo adegyada<br>• Maareeyayaasha xogta iyo macluumaadka | Khabiirada bulshada iyo khabiirada jinsiga ee NPCU iyo SPIU<br>Guddiga xallinta cabashooyinka | Qaran/Dawlad Goboleed/Deegaan |

| Macluumaadka la shaacinaayo | Habka la isticmaalay | Daneeyayaasha bartilmaameedka ah | Masuuliya daha | Deegaanka |
|---|---|---|---|---|
| | • Shirarka bulshada<br>• Dood kooxeedda diirada saaraysa arimo gaar ah , oo aanay ka madhneyn kooxo dumar ah. | | | |
| | • Sahan iyo indho-indheyn toos ah la xiriirta ka faa'idaystayaasha mashruuca.<br>• | • Dhamaan daneeyayaasha a ay kamid yihiin :kuwa tabarta daran iyo kooxaha danyarta ah. | • MOEWR NPCU<br>• FMS SPIU<br>• Sarkaalka isgaarsiinta<br>• Sarkaalka M&E | Qaran Dawlad Gobaleed Deegaan |
| **Kormeerka iyo Ka Warbixinta** | | | | |
| Jawaabcelinta bulshada ee waxtarka hababka kala duwan ee ka qaybgalka | • Wareysiyada qaab-dhismeedka ah<br>• Sahmin khadka ah<br>• Sahminta Qanacsanaanta<br>• Qalabka Kormeerka Kobo ee GIS-ta. | • Dhamaan ka faa'idaystayaasha kowaad ee mashruuca iyo dhamaan daneeyayaaash | • MOEWR NPCU<br>• FMS SPIU<br>• Khabiirada bulshada<br>• Sarkaalka Kormeerka iyo Qiimeynta (M&E). | Deegaan |
| Dib u eegista iyo warbixinta saddex biloodka ah | Warbixinta horumarka waxaa ku jira dib u eegis iyo casharada laga bartay iyo soo koobista cabashooyinka iyo xalinta. | • Xafiisyada MOEWR ee heer federal iyo heer dawlad goboleed | • MOEWR NPCU<br>• FMS SPIU<br>• Sarkaalka M&E<br>• Khubarada bulshada | Qaran/Dawlad goboleed |

43. MOEWR iyo NPCU waxey siin doonaaan daneeyayaasha macluumaadka sooyaalka iyo xogta farsamooyinka eek u habboon mashruuca, kuna filan (7-10 maalmo shaqo), si ay daneeyayaashu u helaan wakhti ku filan oo ay ugu diyaar garoobaan bixinta jawaab celin micno leh

## 5.0 QORSHAHA KA MID NOQOSHADA

**5.1 Noocyada Kooxaha Nugul iyo Kuwa Danyarta ah**

**44. Mashruuca wuxuu tixgelin gooni ah siin doonaa kooxaha danyarta, waxaana ka mid ah:-**

i. Kooxaha laga tirada badanayahay;

ii. Dadka Gudaha ku Barakacay "IDPs"

iii. Kuwa ku nool miyiga fog fog ama meelaha rabshaduhu ay ka dhacaan ee aan haaysan adeeg bulsho iyo waxyaabaha assaasiga ah

iv. Bulshooyinka reer guuraaga ee xoolo-dhaqatada ah;

v. Dadka laxaadka la';

vi. Haweenka laga dhintay iyo kuwa madaxda u ah qoysaska

**4.2.9.1 Bulshooyinka Maxalliga ee Saxaraha ka Hooseeya, Taariikh ahaana aan si Fiican loogu Adeegin (SSAHUTLCs)**

MOEWR waxay xaqiijin doontaa joogitaanka bulshooyinka maxalliga ee saxaraha ka hoseeya, taariikh ahaan aan si fiican loogu adeegin, sida ku cad ESSS7. Si loo go'aamiyoo ku haboonaanta heerka, iyo haddii kooxo buuxin karaanshuruudaha ESS7 laga helo goobaha hirgelinta qorshayaasha SSAHUTLCs, taas oo u baahnaan doontaa in qorsho la diyaariyo. diyaariyo.

Halkan waxa ka maqan xog aan la turjumin

**4.1.1.1 Kooxaha Kale oo Danyarta ah**

[1]

Kooxaha laga tirada badanayahay sida Bantuu, Baajuun, Banaadiri,Reer Xamar, Reer Baraawe, ama koohaha xirfaddaha ku shaqaysta sida: Midgan/Gaboye, Tumaal, Yibir, Galgala), kuwaas oo lagu qiyaasay in ay matalaan saddex meelood meel tirada dadka Soomaaliya, ayaa waxaa socda in laga saaro ka qaybgalka siyaasada. Waxaa laga xiqiraa xuquuqo badan oo ay xaq u leeyihiin, sida: caafimaadka iyo waxbarashada iyo kuwo kale. Haweenka kasoo jeeda dadka laga tirada badanayahay ama ka mid ah Barakacayaasha Guddaha (IDPs), ayaa si khaas ah ay u saameeysay xuquuqdooda xadgudubyadan farahabadan labadan kooxood (Haweenka iyo xubnaha laga tirada badanyahay). Takooridda iyo kala soocida bulshada ee kooxaha nugul, waa mid ka mid ah awooddaha horseedka u ah
barokaca baahsan ee dadka, kuwaas oo daba dheeraada iyo dhibka loogu jiro sidii xal waara loogu heli lahaa.

[1] Tan waxaa ku jiri doona dhammaan kooxaha ka baxsan afarta qabiil ee ugu waaweyn ee degmo gaar ah ama goob juqraafi ah dagan oo ay ku jiraan qowmiyadaha iyo kooxaha shaqada.

Beelaha laga tirada badan yahay ee Soomaaliya, waxaa loo qaadan karaa inay yihiin kuwa ka baxsan afarta qabiil ee waaweyn. Waxa jira saddex kooxood,kuwaas oo ah kuwa laga tiro badan yahay.

i) **Kooxaha Shaqada**- kuwani waa bulshooyinka, ay ka mid yihiin Gaboye, Tumaal iyo Yibir- waxaa dhaqan ahaan qabtaan hawl gaar ah, taas oo ay u tixgeliyeen qabiilada ugu waawaynSoomaalida in ay caado ahaan iyaga gaar u tahay. Waxey qabtaan shaqooyinkan: sameeynta hargaha, samaynta dheri dhoobka, Samaynta biraha, ugaarsiga iyo qaar kamid ah dhaqamada caafimaad ee soo jireenka ahaa, (ay kamid tahay samaynta Gudniinada Fircooniga- FGM ). Bulshooyinkan waxaa laga helaa dalka Somaaliya oo dhan. Waxay maalin walba la kulmaan takoorid bulsheed oo daran. Guurka dhex mara dadka da'da yar ee bulshooyinkan kasoo jeeda iyo kuwa qabiilada waawayn, bulsho ahaan waa mid aan la aqbalin- iyada oo mararaka qaar ay dhacaan falal cawaaqib xumo reeba, kuwaas oo aargoosi ku salaysan. Waxa soo shaac baxda diidmo bulsho iyo hanjaab la xiriirta haddii xiriir guur dhexmaro, laba qof oo kasoo kala jeeda labada kooxood ee aan soo sheegnay.

ii) **Bulshooyink xeebaha**- bulshooyinkan waxaa ka mid ah Asharaaf, Banaadiri, Baajuun, Baraawe. Waxay kasoo farcameen/ka yimaadeen muhaajiriintii ka timid Jasiiradaha carabta (sidoo kale Teliyaani), kuwaasoo degay, isna isguursadeen Soomaalida. Mar ayay ku noolaayeen nolal qiimo leh oo sareysa xarumaha magaalooyinka waawayn ee xeebta. Kuwo badan oo kamid ah bulshooyinkan, waxaa barakiciyay colaaddo (gudaha iyo dibaddaba).

iii) **Kooxaha Bantu** - inta badan waxaa laga helaa bartamaha koonfureed, Bulshooyinkan waxaa laga yaabaa asal ahaan in ay kasoo guureen Waqooyiga dhulka Baantuuda ee Bartamaha iyo Bariga Africa. Bulshadani waxey u dhowdahay in nolol maalmeedkooda ay ka heli jireen beerashada dalagyada- inta badan meelaha carra-santa ah ee webiga hareerihiisa ee Bartamaha Koonfureed, waxey la noolaayeen qabiilada Somaalida kuwooda waawayn, kuwaas oo inta badan ku tiirsanaa xoolo dhaqashada, kooxaha Baantuugana ku haystay xaalad adoonsi iyo mararka qaarna ay u ahaayeen shaqaale aan mushaar lahayn.

Warbixinta Guud ee Baahida Bani'aadinimo Somaaliya ee 2021 ay Soo saartay UN OCHA, waxay muujinaysay in ka badan 2.6 milyan oo dad ah ay ku barakaceen guddaha dalka, kuwaas oo weli wajahaayo khataro halis badan oo takoor ah, raritaan khasab ah iyo faquuq. Somaaliya waxey diwaangelisay tiradii ugu badnayd dadka barakacay, ee saddexdii sano lasoo dhaafay; 1.2 milyan ee 2020; 884,000 ee 2018; iyo 770,00 ee 2019. Xaaladaha abaarta, colaadda iyo xaaladaha kale ee cimilada oo argagaxa leh, waxay gacan ka geysanayaan heerarka daran iyo barakaca dabadheeraaday ee horay loogu dhawaaqay.

Dadka guddaha ku barakacay (IDP-ka), waxay si guud degaan, deegaano aan rasmi ahayn oo magaalooyinka ku yaal, halkaas oo helidda adeegyada iyo shuruucda loo siman yahay ay liitaan. Sidaa darteed waxay qayb ka yihiin dabaqadaha ugu saboolsan Soomaaliya. Waxayna inta badan aad ugu baahan yihiin inay helaan cunto, biyo, nadaafad, adeegyo caafimaad, hoy iyo waxbarasho (Xarunta Kormeerka Barakaca Gudaha (IDMC 2020, p.30

**5.2 Istiraatijyadda lasoo jeediyay si loogu daro Fikradaha kooxaha danyarta ah**

45. Waxaa jira caqabado bulshadeed, dhaqaale iyo kuwo jireed, taasoo ka reebaysa shaqsiyaadka danyarta ah iyo kooxaha ka socda ka qaybgalka hawlaha iyo mashaariicda. Caqabadahaas oo ay kamid yihiin: la'aanta ilo dhaqaale, helitaanka macluumaad, goobaha shirarka aan la tagi karin, ceebeynta bulshada, ka warqab la'an iyo/ama wadatashi liita.

46. SEP-da waxey qeexeysaa sida kuwa danyarta ah looga qayb galin lahaa wadatashiyada inta mashruuca uu socdo,sidaa awgeed waxay awoodi karaan ka qaybgalaan la tashiyada nashqada,kuwaas oo u sahli

doonna in ka mid noqdaan kafaa'idaystayaasha mashruuca. SEP waa la cusboonaysiin doonaa markii goobaha gaarka ah ee mashruuc-hoosaadka la aqoonsado, waxaanala tixgelin doonaa xiliga qaybinta korantada iyo kheyraadka ee kooxaha kala duwan iyo shaqsiyaadka goobaha mashruuca jooga. Habka ka qaybgalka daneeyayaasha waxa lagu wargelin doonaa khariidad dhamaystiran oo muujinaysa qaab dhismeedka bulshada iyo hoggaaminta mashruuca goobaha lagu beegsanayo, kuwaas oo falanqayn doona arrimaha bulshada dhaqdhaqaaqyada iyo qaababka qabiilka, jinsiga iyo ka saarista da'da ku salaysan iyo takoorida goobaha mashruuca.Layliga khariidaynta ayaa xaqiijin doona joogitaanka Dhaqan-dhaqameedka bulshooyinka deegaanka Saxaraha ka hooseeya ee aan loo adeegin/ wax loo qaban, sida ku cad ESS7, si loo go'aamiyo ku-dhaqanka qorshayaasha SSAHUTLC

47. Mashruuca wuxuu dejin doonaa xeelado maangal ah, si loo howlgeliyo bulshada ay khuseyso iyo daneeyayaasha kale. Sidoo kale in laga guuleysto oo la joojiyo ceebaynta bulshada, lana dhiirigeliyo iskujirta bulshada, meeshana looga saaro faquuqa iyo gooniyeynta.

48. Xulashada goobaha mashruuca waxay u baahantahay in lagu saleeyo tixgelin farsamo iyo baahiyo jirta,arintani waxay dhici doontaa kadib, marka la sameeyo qariiradeynta qabiilada iyo joogitaanka kooxaha laga tirada badanayahay iyo Barakacayaasha Guddaha (IDPs). Si kastaba ha ahaatee, iyadoo la ogyahay in ay jiraan meelo badan oo suuurtagal ah, kamidnoqoshada waa in la tixgeliyaa, khaas ahaan meelaha ay joogaan barakacayaasha guddaha (IDPs), haddii kale, waxa dhici karta in qabiilada laga tirada badanayahay la yaso, iyadoo ay ugu wacanatahay qabiilaysiga bulshada ka dhex jira. .

49. Wadatashiyada loo dhanyahay ee bulshada iyo maaraynta qaab-dhismeedkoodu, waxay muhiim u yihiin guusha qorshaha kamidnoqoshadada . Ujeedooyinka aasaasiga waxay ahaan doonaan:

i. In la fahmo qaab-dhismeedka hawsha eek u aadan bulshooyinka.
ii. In la raadiyo talabixin/jawaab-celin si looga fogaado ama loo yareeyo suurtagalnimada samaaynta daran ee la xiriirta faragelinta qorshaysan;
iii. In la aqoonsado qaababka dhaqan ahaan ku habboon cibiraadaha yaraynta saamaynta
iv. In la qiimeeyo lana dhaqangeliyo fursadadaha dhaqaale, taasoo MoEWR ta ay ku hormarin karto si ay u dhamaystirto tilaabooyinka loo baahanayahay, si loo yareeyo saamaynta daran.

50. Khariidadeynta daneeyayaasha iyo Shaacinta macluumaadka, iyo latashiyada ayaa la sameyn doonaa , iyadoo loo dhigayo si dhaqan ahaan ku habboon iyo jinsiga ahaana waafaqsan, intaa waxa raaci doona in hab wadar-ogol loo qaabeyn doono, iyadoo ay ku lug leeyihiin wakiilada kooxaha iyo hay'adaha ay khusayso.

51. Wadatashiyada waxaa loo fulin doonaa si ballaran oo qoto dheer. Ugu horayntii, Ka hor inta la bilaabin hawl kasta oo mashruuca khusaysa, NPCU ayaa waxay qabanqaabin doontaa latashiiyo lala yeelanaayo madaxda bulshada, Guddiyada horumarinta ee heer deeggaan ka jira iyo wakiilada kooxaha laga tirada badanyahay oo ku saabsan qaabaynta hawlaha mashruuca.

Wadatashiga waxa loo fulin doonaa si balaadhan laba marxaladood gudahood. Marka hore, ka hor inta aan la bilaabin mashruuc kasta, NPCU waxay qabanqaabin doontaa la-tashiyo lala yeesho hoggaamiyeyaasha bulshada,ee heer deeggaan, guddiyada horumarinta iyo wakiilada kooxaha danyarta ah oo ku saabsan baahida jirta iyo saamaynta togan iyo ta taban ee ku iman kara hawlaha mashruuca. Marka labaad, waxa la qaban doonnaa wadatshiyo si qoto dheer loo lafaguray oo ku saabsan sidii loog

heshiin lahaa goobaha mashruuca uu ka fulayo. Intaa waxa raaci doona iyo sidoo kale heshiisyada beesha ee qoondaynta dhulka,aqoonsashada tallaabooyinka yaraynta khatarta deegaanka iyo bulshada, iyo heshiisyada wadaagga biyaha, iwm

52. NPCU iyo SPIUs waxay:

i. Waxey si baaxad leh u fududayn doonaan ka qaybgalka kooxaha laga tira badanyahay; odayaasha/hogaamiyaasha bulshada; iyo CBOs;

ii. In la siiyo kooxaha danyarta ah iyo shaqsiyaadka dhamaan macluumaadka ku habboon ee kusaabsan hawlaha mashruuca;

iii. In la qabanqaabiyo, lana sameeyo qaabab wadatashiyo, taas oo xaqiijinaysa hadallka xorta ah ee ku saabsan aragtiyahooda iyo waxa ay doorbidayaan;

iv. In la diwaaneliyo faahfaahinada dhamaan shirarka wadatashi ee kooxaha danyarta ah iyo kuwa liita ee ku saabsan aragtidooda ku aaddan howlaha mashruuca iyo saamaynta la xiriirta, gaar ahaan, mida daran;

v. In lala wadaago talo-bixin/jawaab-celin walba oo ay bixiyeen dadwaynaha bar-tilmaameedka ah; iyo

vi. In la siiyo shuruudaha guud ee la’ isku raacay, kadib la tashiyadii la sameeyay;

53. Hubi in dhaqaale loo qoondeeyay fududaynta ka qaybgalka kooxaha danyarta ah, oo ay ku jiraan kooxaha naafada shirarka wadatashiga, la socodka mashruuca iyo hawlaha kale ee khuseeya. Mashruucu waa inuu xaqiijiyaa faa'iidooyinka kooxaha danyarta ah, iyadoo la hubinayo in lala tashaday, heli karaana habka gudbinta cabashooyinka oo ah mid ay ku kalsoonaan karaan, iyo in ay ka faa’idaysan karaan shaqooyinka mashruuca.

54. Arrimahan soo socda ayaa wax laga qaban doonaa inta lagu gudajiro marxaladda hirgelinta ee mashruuca:

i. Bixinta habka wax ku oolka ah ee hirgelinta kormeerkaku saabsan qorshaha Ka-wada-qaybgalka;

ii. Horumarinta hababka isla xisaabtanka, si loo xaqiijiyo faa’idooyinkii la qorsheeyay ee mashruuca , taas oo laga fiirinayo in ay helaan shaqsiyaadka danyarta ah iyo kuwa kale;

iii. In laga qayb geliyo Ururada Bulsahda (CBOs) iyo Ururada aan Dawliga ahayn (NGOs), kuwaas oo leh khibrad ku habboon, si ay u wajahaan, uguna adeegaan shaqsiyaadka danyarta ah/ kooxaha, ayadoo loo maraya horumarinta iyo hirgelinta qorshaha waxqabadka;

iv. In la xaqiijiyo qoondo miisaaniyadeed ku habboon kheyraadka ku aaddan qorshaha ka-midnoqoshada;

v. In la bixiyo farsamo caawineed, si loo wado hawlaha wax ka-qabashada baahida dadka danyarta ah; iyo

vi. In la xaqiijiyo ilaalinta kooxaha urur dhaqameedka bulshada danyarta ah, dhaxalkooda dhaqanka, iyo ururada siyaasada iyo bulshada ee sooyaalka ah, kuwaas oo u baahan in si gaar ah loo ilaaliyo.

**6.0 HAB-FARSAMEEDKA CABASHADA**

55. Ujeedada hanaanka cabashada (GM), waa in uu xoojiyaa isla xisaabtanka iyo in uu xaqiijiyo daah-furnaanta ka faa'idaystayaasha, kaas oo siinaya marino/jidad iyo qaabdhismeedyada mashruuca ee daneeyayaasha, si ay u bixiyaan jawaab-celin iyo/ama iyo in ay muujiyaan cabashooyinka la xiriira hawlaha iyo shaqooyinka mashruuca lagu taageero. . Iyadoo la kordhinayo daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka, GM-gu ujeedkiisu wuxuu yahay inuu yareeyo khatarta mashruuca ku aaddan ee haddana si aan ku talagal ahayn u saameeya muwaaddiniinta/ka faa'iideystayaasha. Waxay u adeegaysaa si leh jawaabcelin muhiim ah, iyo habfameed barasho ku dhisan oo ka caawinaya hormarinta saameynta mashruuca.

**56.** GM ta wuxuu ujeedkiisu tahay in uu wax ka qabto cabashooyinka la xiriira mashruuca wakhti ku haboon iyo qaab Daaha furan oo wax ku'ool ah. Macluumaadka kusaabsan GM-ta, waxay ahaan doonaan diyaar, waxana heli doona dhamaan qaybaha mashruuca uu saameeyay, dhinacyada daneynaya iyo kuwa liita iyo kooxaha danyarta ah. GM ta waxaa loo qaabeeyay qaab dhaqan ahaan ku haboon in uu ka jawaabo dhamaan cabashooyinka mashruuca laga soo gudbiyaya. Habkan xallinta cabashooyinka kaama reebeyso hababka xallinta garsoorka iyo maamulkiisa.

**6.1 Noocyada Cabashooyinka:**

**57.** Cabashooyinka waxaa soo jeedin kara daneeyayaasha ay ka mid yihiin: saaxiibada dhow, qandaraaslayaasha maxalliga, xubnaha bulshada ee meesha uu mashruuca ka socdo ku dhaqan ama xubnaha dadwaynaha guud uu khuseeyo qaab kasto oo mashruuca hirgelinta uu ahaado. Cabashooyinka suurtagalka waxaa kamid ah:

i) Xulashada goobaha laga qabanaayo shaqada mashruuca;

ii) Cadaaladda qandaraas bixinta;

iii) khayaanada ama arrimaha musuqa;

iv) Kamidnoqoshada;

v) Saamaynta bulshada iyo deegaan;

vi) Tayada arrimaha adeega;

vii) Isticmaalka liita ee qarashaadka;

viii) Rabshada/ xasaradda ku Salaysan Jinsiga (GBV) iyo Ka Faa'idaysiga ku yimaadda Galmada, Xadgudubka iyo Dhibaateynta (SEA);

ix) Shaqada qasabka ah, ay kamid tahay ka ganacsiga dadka iyo ku shaqaysiga maxbuuska.

x) Shaqaaleyta caruurta; iyo

Xi) Hanjabahaadaha loo jeedinayo shaqsiga iyo badbaadada bulshada

**6.2 Qaabka iyo Geedi socodka GM**

**58.** Sida ku xusan heerarka Bangiga Aduunka, hab farsameedka cabashada (GM-), waxay ka barbar shaqayn doontaa Qorshaha Hawlaha ee GBV/SEAH, taas oo ay ka mid tahay: ka warbixinta iyo tilmaamaha gudbinta (la darsey ESMF-ta). GM-ta sidoo kale, waxa si lamid ah ay ka barbar shaqayn doontaa shaqaalaha gaarka ee GMs, kuwaas oo lagu muujiyay LMP-da.

**59.** MOEWR waxay lahaan doontaa mas'uuliyada kormeerada, kuwaas oo la xiriira xalka dhamaan cabashooyinka hawlaha mashruuca, iyadoo loo tixraacaayo shuruucda FGS, FMS iyo heerarka deegaanka iyo bulshada ee Bangiga Adduunka, oo si toos loogu qeexay GM-ta

**61.** Guddiga Xallinta Cabashooyinka (GRC) ayaa lagu dhisi doonaa heerarka FMS iyo FGS ah 6 bilood kadib, marka la arko mashruuca waxtarkiisa uu gudoominaayo maareeyaha mashruuca. Shaqaalaha ku habboon ayaa lagu dari doonaa. Shaqaale la xiriira hawsha ayaa lagu dari doonaa kolba sida ay suurtagal u noqoto, iyadoo ku xidhan cabashada ka timaada ( wax iibsiga, lacagta, kormeerka iyo qiimeynta, La taliyaha Rabshadaha ku salaysan jinsiga GBV iyo xiriirka xogta).


Khubarada bulshada waxay uruurin doonaan qoraalada shirarka, waxayna dabagal ku samayn doonaan hab-xallinta cabashada. GRC waxay kulmi doonaan bil kasta, si ay dib ugu eegto nidaamka cabashooyinka yaryar, waxay xaqiijin doontaa dhamaan bulshada in ay ka warhaayaan nidaamka iyo mashruuca. Shirar degdeg oo heerka MOEWR NPCU iyo FMS SPIU ayaa la qaban doonaa haddii ay jiraan cabashooyin muhiim ah oo u baahan in wax laga qabto. Cabashooyinka muhiimka ayaa lagu muujin doonaa buug-gacmeedka ee Habxalinta farsamo (GM.) Cabashooyinka halista ah ama daran ee ku lug leh waxyeelleynta dadka ama deegaanka, ama kuwa halis ku keeni kara sumcada mashruuca, ama kuwo ka kaca ee kharta ku ah samcadda mashruuca, intaas kadib xabiirka bulshada ee FMS ayaa si degdeg ah u ogaysiin doona khabiirka bulshada ee FGS, ama madaxa NPCU-da, kuwaas oo iyaguna u sheegi doona/ ku wargelin doona Bangiga Adduunka muddo ku siman 48 saacaddood, sida ay qorayaan shuruuddaha tabinta dhacdooyinka la xiriira deegaanka iyo bulshada (ESIRT)

.

**62.** Dhamaan qandaraslayaasha waxaa laga rajaynayaa in ay wacyigeliyaan shaqaalahooda mashruuca.Waa in ay haystaan qof habka cabashada ka shaqeeya (GM) , kaas oo ogaan doona, loona soo gudbin doono cabashooyinka lala xiriirinaayo dhismooyinka iyo shaqaalahooda iyo in ay dhaqan-geliyaan cabashooyinka qaab-dhismeedka u gaar ah shaqaalahooda (sida lagu dhex faafaahiyay LMP).

**63.** Heerka bulshada, gudigga degaanka ee mataalada xooggan ku dhex leh kooxaha danyarta ah ayaa heli doona cabashooyinka sida tooska ah uga imanaya bulshada, qandaraslayaasha, iwm. Cabashooyinkaas waxa loo gudbin doonnaa khabiirka arrimaha bulshada ee FMS, si uu uga qeybqaato xallinta iyo dabagalka. Jaantuska 1, waxaa uu soo bandhigaayaa qaabdhismeedka uu u isticmaali doono mashruuca maareynta cabashooyinka.

*Jaantuska 1: Habraaca cabashooyinka ee mashruuca*




## 6.3 Tacaddiyada ku Saleysan Jinsiga

64. kiiisaska GBV/SEAH waxaa lagu soo wargelin karaa iyadoo lasoo marinayo mashruuca guud ee GM. Si kastaba ha ahaatee, marino dheeraad ah oo warbixinta lagu gudbiyo ayaa la aqoonsan doonaa iyo waxaana lagu soo dhex dari doonaa GM-ta (faahfaahinta waxaa lagu bixin doonaa qorshaha waxqabadka). Qofka GBV ka badbaaday wuxuu xor u yahay xaquuqna u leeyahay in ku wargeliyo dhacdada qof walba: xubnaha bulshada; shaqaalaha mashruuca; maareyaha kiiska GV; ama adeeg bixiyaha. Ayadoo la tixgelinaayo dabeecada xasaasiga ee GBV, GM-ta waxay bixin doonta qaabab kala duwan oo lagu soo gudbiyo cabashooyinka, sida: teleefoonka, fariimaha qoran iyo emaylka. Dhamaan shaqaalaha ay khuseyso ee NPCU waxay heli doonaan tababar ku saabsan maaraynta cabashooyinka GBV/SEAH iyo

hababka gudbinta, sida habboon inta lagu guddo jiro marxaladda bilawga mashruuca iyo ka qayb ahaan xirmada soo dhawaynta shaqalaha. Qofka ugu muhiimsan GM-ta ayaa lagu tababari doonaa hab-raacyada ay ka mid tahay gudbinta, wargelinta iyo hab-raacyada ogolaanshaha la ogaysiiyay,si uu u helo kiisas kaas qaab ku haboon iyo isla markiiba uu u gudbiyo nadaamka gudbinta ee GBV/SEAH. Qofka ugu muhiimsan GBV wuxuu xaqiijin doona jawaab ku habboon, asagoo: (i) siinaya deegaan daryeel nabdoon leh, kaas oo ixtiraamaya sirta iyo rabitaanka badbaadaha; (ii) haddii badbaadaha uu ogolaado, hel ogolaanshihiisa saxda ah, kadibna oo samee gudbin; (iii) bixi macluumaad lagu kalsoonaan karo oo dhamaystiran oo ku saabsan adeegyada la heli karo iyo taageerada la siiyo kuwa ka badbaaday GBV/SEAH.

**65.** GM ta waxey soo jeedineysaa astaamahan muhiimka ah ee soo socda oo ku saabsan ka hortagida GBV,SEAH: (i) dhisid guryo haween oo ku salaysan heerka bulshada, kuna shaqeeya maareynta cabashada, si loo fudadeeyo ka warbixinta xogta si amaan ah; (ii) xog gudbinta leh marinno badan, si loo helo cabashooyin ( marinno la go'amin doono ka dib la-tashiga bulshada); (iii) ku xali cabashooyinka meesha adeegga lagu bixiyo, si loo dhimo macluumaadka iyo qarashaadka iyo marinnada xog gudbinta ee xasaasiga, kuna salaysan jinsiga ; iyo (iv) Adeegso xariirka adeegyada GM ee heer bulsho, si loo abuuro ka warqabka GBV/SEAH,tani waxay suurta gelinaysaa dadka mashruuca uu saameeyay in ay kaydiyaan cabashooyinka.

**66.** ka- faa'iideystayaasha iyo bulshooyinka guud ahaan waxay dhiiragelin doonaan in ay soo gudbiyaan dhamaan kiisaska la xiriira GBV/SEAH, taas oo loo marayo habka gudbinta iyo hab xallinta cabashooyinka. Tani waxay si faafahsan uga muuqan doonta dhamaan shirarka wacyigelinta, sidoo kalana waxay ay qeyb ka haan doontaa macluumaadka si waadax loo shaacinaayo. Habka gudbinta waxaa xaqiijinaya badbaadiyaasha ay helaan adeegyada laga marmaanka ah ee ay u baahan karaan. Adeegyadaas oo ay kamid yihiin: caafimaadka, sharciga, la-talinta iyo in kiisaska loo gudbiyo booliiska haddii badbaadiyaha uu doorto sidaas.Nidaamka rasmiga ah ee shaaciyintooda ka warbixinta, iyo ka jawaabista kiisaska la xiriira GBV/SEAH, waxa lagu qeexi doonnaa qorshe hawleedka GBV/SEAH iyo GBV/SEAH.

**67.** Haddii kiiska GBV/SEAH-da la soo wargeliyo ayada oo loo maraayo mashruuca GM, qofka masuulka GM ee heerka ku habboon ayaa u gudbin doona kiiska SPIU iyo NPCU, muddo ku siman 24 sac guddahood. Intaa waxaa dheer, kiisaska SH ayaa laga war bixin doonaa ayadoo loo maraayo GM-ta shaqaaalaha, haddii ay quseeyso shaqaala toos ah ama shaqaala ka socda qandaraasle hooseeya, Saaxib NGO ah ama xitaa shaqaale bulsho, ayada oo la raacaayo habka ku salaaysan badbaadada. SPIUs waxaay masuul ka ahaan doontaa qabashada kulamada wacyigelinta ee qandaraaslayaasha iyo kuwa ugu muhiimsan ee alaabta geeya ayada oo loo raacayo anshaxa habka dhaqanka, waajibaadka iyo hawlaha kor u qaadida ka warqaabka bulshooyinka dhexdooda. Dhamaan wargelinta ku saabsan GBV/SEAH waxay xadidi doonaan macluumaadka ayadoo loo tixraacaayo badbaadaha rajadiisa quseeysa qarinta xogta sirta ah, waa haddii badbaaduhu uu ogaalaado warbixin dheeraad ah. Macluumaadka ayaa lala wadaagi doona keliya ayadoo lagu saleenaya baahida loo qabo in lagu garto dhacdada asalkeeda, iyadoo waliba la ilaalinayo dhamaan macluumaadka sirta ah, kuwaas oo sababi kara ogaanshaha qofka badbaaday iyo haliskasta oo soo wajihi karta, sida aargoosi iwm.


*Shaxda 5-aad: Habababka iyo Qaab-dhismeedka Xallinta khilaafaadka*

| T/T | talaabo | Sharaxaada habka | Waqtiga go'an | Mas'uuliyad |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Qaab-dhismeedka hirgelinta GM | • Guddiga xallinta cabashada (GRC) ayaa la dhisi doonaa heer FMS iyo heer FGS, kuwaas oo uu guddoomin doonnaan maareeyaha mashruuca. Khabiirrada bulshada heer FGS iyo heer FMS, waxay heli doonaan cabashooyinka, ayagoo isticmaalaya waddooyin kaladuwan iyo in lagu wargeliyo, ayadoo lalaltashanaayo haay'adaha ku habboon gaarsiinta heerrar kala duwan, ayadaoo lagu salaynaayo cabashooyinka. Guddigan (GRC)da waxay kulmi doonaan 2 bilood oo kasta, si ay dib ugu sameeyan jaqada habka cabashada (GM ) iyo diiwaanka cabashooyinka<br>• Guddida bulshada, tusaale, Guddiyada Horumarka Xaafadaha (VDCs) sidoo kale waxay lahaan doonnaan xarumo cabashooyinka ka shaqeeya. | Inta uu socdo hirgelinta mashruuca | Maarayaasha mashruuca heer FGS aiyo FMS |
| 2. | Cabasha qaadasha | • Cabashooyinka waxaa lagu gudbin karaa iyadoo la deegsanayo wadiiqooyinkan; teleefoonka, fariin qoraal ama iimelka ,khadka teleefonka gacanta ee lacag la'aanta ah, sanduuqyada cabashada, iyo ciwaanada iimeelada, mareegta iyo shaqsi ahaan xafiisyada mashruuca. | Inta uu socdo hirgelinta mashhruuca | Khabiirada bulshada |
| 3. | Qaatayaasha, kalasoocida iyo meelaynta | Cabasha kastoo oo la helo, waxa loo xawilaa GRC, waxaana lagu diiwaangeliyaa diwaanka GM, iyo waxaa loo kala saaraa sida ay cabashooyinku u kala duwan yihiin. khabiirka bulshada ayaa qiimayn doona cabshada, asagoo la kaashanaya PM , una gudbin doona heerka haay'adaha ay quseyso ee masuuliyadeeda leh. Haddii cabashada si sahlan aan lagu xallin Karin, Khabiirkla bulshada oo kaashanaya maarayaha mashruuca ayaa isugu wici doona shir GRC , wuxuuna samayn doonnaa qorsho waxqabad. | Markii la helo cabshada | GRC iyo Khubarada bulshada |
| 4. | Qirasho iyo Dabagal | • Helitaanka cabashada qofka cabanaya waxaa xaqiiijiyay maareeyaha mashruuca | Helitaanka 7 maalmood gudohooda | Goobaha Dadka ka shaqeeyancab ashada deegaanka. GRC |
| 5. | Xaqiijin, baaritaan, ficil/fal calin<br>Verification, investigation, action/response | • Baaritaanka cabashada waxaa hogaaminaya jawaabcelinta GRC. Falcelinta cabashada waxa marka hore soo qoraya GRC isagoo ula xiriirayaa qofka cabanaya jidka ugu habboon ee wax lagu weydiin karo. .<br>• Marka loo baahdo inla xaliyo cabasho dood dhalisay, guddiga ( GRC) waxay casuumi doontaa dhinaca dhibaataysan (ama wakiil), waxaynago'aan ka gaari doontaa xal ay labada dhinac aqabali karaan iyo ogolaanaya in kiiska lasoo xiro, ayadoo lagu salaynaayo heshiiska labad dhinac.<br>• Haddii kooxda dhibaataysan aynan ku qancin jawaabta, waxay rafcaan u qaadan karaan heerka ugu sareeya ee xiga, kaas oo uu kamid yahay Bangiga Adduunka. Hab-maamuus ayaa la diyaarin doonaa. | Shaqo 10 maalmood gudaheeda | GRC |
| 6. | Hirgelinta Jawaabta | • Qofka matala GM, wuxuu dabagal ku samayn doonaa jawaabaha lagu taliyay iyo waxay ka xaqiijin doontaa xalka cabashooyinka. Haddii ay dhacdo xalka in uu guulaysto kiiska waa la xirayaa. | Bil walba | GM Barta xudunta ah |

| T/T | talaabo | Sharaxaada habka | Waqtiga go'an | Mas'uuliyad |
|---|---|---|---|---|
| | | • Kiisasaska qaar, xaaladdaha haddii qofka cabanaya uunan ku qancin jawaabta, xarunta dhexe ee GM ta ayaa hagi doonta shakhsiga ama kooxda, siin doontana in ay raadiyaan hahab kale oo lagu xaliyo cabashooyinkooda, kuwaas oo ay kamid yihiin: dhexdhexaadinta, ukala garqaadida iyo nidaamyada garsoorka | | |
| 7. | Kormeerka iyo ka warbixinta | • Xogta ku saabsan cabashooyonka ayaa la uruuriyaa, waxaana lagu diiwaangeliyaa diiwaanka GM, sidoo kale iyadoo laguwargeliyo khabiirka bulshada bil walba.<br>• Khabiirka bulshada wuxuu ku dari doonaa GM kormeer kiisa/keeda iyo la socodka hawlgalka iyo wuxuu samayn doonaa baaritaano goobta la xiriira oo kusaabsan hirgelinta.<br>• Qandaraaslayaasha iyo alaab-qaybiyaasha koowaad, ayaa siin doona NPCU warbixino isku duuban oo falanqaysan, saddexdii bilba hal mar. Xogtaas oo ay kamdi ahaan doonnaan, kuwan : tirada, nooca iyo xaalada cabashada. Warbixinadan waxay aas aas u noqon doonaan dhamaan warbixinada joogtada ah ee ka imaanaya NPCU-da, kuna socda Bangiga Addunka.<br>• NPCU-da waxay bixin doontaa warbixin lagu soo koobay 'Excel-Sheet" oo ku saabsan jawaab-celinta iyo cabashooyinka laga warbixiyay taas oo lagu xiri doono Qaabka Maaraynta Macluumadka Mashruuca (MIS) , kadibna lagu xiri doono Qaab-dhismeedka Natiijooyinka ee Kormeerka iyo indho-indheynta (M&E). Koobidda waxaa kaloo ku jiri doona kala qaybinta cabashooyinka qaybaha kala duwan, sida kuwa la xiriira GBV/SEA. Suurtagalnimada in la yeesho GBV/SEA/H GM gaar ah ayaa sidoo kale la tixgelin doona.<br>• Kooxda mashruuca waxay sii wadi doonaan diiwanka xogta ee ka qaybqaadashada daneeyayaasha, diiwaankaas oo ay ku jiraan sharaxaad ku saabsan daneeyayaasha lagala tashaday, iyo soo koobid ku saabsan jawaab-celinta/cabashooyinkii la helay intii lagu gudajiray wadatashiyada.<br>• NPCU da waxay casharo ka soo saari doontaa GM ta,waxay samayn doontaa falanqayn ku saabsan cabashooyinka guud, iyadoo najiitooyinka la wadaagi doontaa dhamaan qandaraaslayaasha iyo xubnaha muhiimka ah ee kooxda mashruuca. | Bil walba<br><br>Saddex bilodle ah<br><br>Sanad le ah | IP/Qandaraasl ayaasha<br><br>Khabiirka Bulshada<br><br>IP/Qandaraslay aasha<br><br>NPCU |
| 8. | Bixinta Jawaab-celinta | • Jawaabcelinta ka socota dadka cabanaya ee ku saabsan qanacsanaantooda ku aaddan xallinta cabashooyinka ayaa la uruuriyay , sidoo kalana lagu diwaangeliyay diwaanka | Markay soo galayaan | Khabiirka bulshadada |
| 9. | Tababarka | • Baahida loo qabo tababarka shaqaalaha/la taliyayaasha mashruuca, qandaasleyda, iyo la taliyayaasha kormeerka ayaa la qiimayn doonaa, kadibna la siin doonnaa tababarka lagamamaarmaanka u ah markaas. | Billowga hirgenlinta mashruuca | FGS NPCU and FMS SPIU |
| 10 | Ka Warbixinta dhacdada | • Dhacdooyin daran, kuwaas oo sababay saamayn xun oo deegaanka ah, dhinacyada mashruuca uu saameeyay, dadwaynaha ama shaqaalaha, tusale, sida: dhimasho, Rabshadaha la xiriira jinsiga (GBV), shaqada qasabka ah ama shaqaaleysiinta carruurta, ayaa IP ay ku wargelin doontaa NPCU-da iyo WBG da, (faahfaahinta ku saabsan nidaamkan ayaa lagu qeexi doonaa Nidaamayada Maaraynta Mashruuca.) | 24 saac gudohooda | IP/NPCU |

| T/T | talaabo | Sharaxaada habka | Waqtiga go'an | Mas'uuliyad |
|---|---|---|---|---|
| 11 | Cabasho ku Saabsan SEAH | • Haddii cabashooyinku ay yihiin kuwo la xiriira galmo, waxa loo kala saari karaa GBV/SEA ama Qorshaha Waxqabadka SEAH, IP-gu ayaa kiiska u maarayn doonaa si habboon, una gudbin doonaa Habraacyada warbixinta ee GBV-da iyo nidaamka gudbinta ee lagu qeexay GBV/SEA iyo Waxqabadka SEAH. Tababar gaar ah oo ku saabsan sida looga jawaabo, loona maareeyo cabashooyinka la xiriira GBV/SEA ayaa looga baahan doonaaa dhamaan hawl-wadeenada GM-ta iyo shaqaalaha mashruuca ee ay khuseyso. | Ka warbixinta 24 saac gudohooda | IP/qandaraasla yaasha |
| 12 | Racfaanka habka cabashada ( GM) iyo Hababka Kordhinta | • Haddii aan heshiis laga gaarin xallinta cabashada, kooxda mashruuca ayaa usoo bandhigi doonto cabasho-bixiyaha fursado racfaan iyo hababka kale oo dalka laga heli karo. Hababka cabasho gudbinta, waxaa ka mid noqon doona: Guddi Madax-banaan; xafiisyada guddaha ama dibadda ama shaqsiyaad leh heerka la mahdiyay ee madax-banaanida, iyo qayb saddexaad oo xaqiiqo raadin, fududaynta, iyo ergada dhexdhexaadinta. Iyadoo ku xiran cabashada, racfaanka waxaa laga yaabaa in uu ku lug yeesho in qofka dhiban la siiyo fursad uu ku raadsado sixitaan, iyadoo loo marayo hay'adaha gudbinta sharciga ee dalka ka hawlgala. | Marka loo baahanayahay | NPCU |
| 13 | Adeega Xallinta Cabashooyinka ee WBG (GRS) | • Xafiiska Bangiga Aduunka ee Soomaaliya: bulshooyinka iyo shaqsiyaadka aaminsan in uu si daran u saameeyay mashruuca Bangiga Adduunka uu taageero ayaa u gudbin kara cabashooyinkooda, iyagoo isticmaalaya hababka hada jira ee lagu saxaayo cabashada mashruuca ama xafiiska Bangiga Adduunka e Soomaaliya ee: smaliaalert@worldbank.org | Marka loo baahanyahay | Xafiiska Bangiga Adduunka ee Soomaaliya |
| 14 | Adeegyada Xallinta Cabashooyinka ee Bangiga Adduunka (GRC) | • Haddii jawaab aan laga helin xafiiska Bangiga Addunka ee Soomaaliya, cabashada waxaa loo gudbin karaa Adeega Xallinta Cabashooyanka ee Bangigga Adduunka, iyadoo la isticmaalayo iimaylka: grievances@worldbanka.org. GRS ta waxay xaqiijisaa in cabashooyinka loo helo si degdeg ah, dib loogu eego si wax looga qabto tabashooyinka la xiriira mashruuca. Bulshooyinka iyo shaqsiyaadka uu saameeyay mashruuca waxay u gudbin karaan cabashadooda Guddiga Kormeerka Madaxa Banaan ee WB, kaas oo go'aamin doono in ay waxyeelo dhacday, ama ay dhici karto, taas oo ay sabab u tahay u hoggaansanaan la'aanta WB ee siyaasadaheeda iyo hababkeeda. Cabashooyinka ayaa la gudbin karaa wakhti kasta ,kadib markii tabashooyinka si toos ah ay u gaaraan ama u dareemaan Bangiga Adduunku. Sidoo kale, marka maamulkabangiga la siiyo fursad ay kaga jawaabaan. Si aad u hesho macluumaadka ku saabsan sida cabashooyinka loogu gudbiyo Adeega Shirkada Xallinta Cabashooyinka ee Bangiga Aduunka, fadlan booqo http://www.worldbank.org/en/projects-operations/products-and-services/grievance-redress-service. www.inspectionpanel.org | Marka loo baahnayahay | Guddiga Kormeerka Madaxa Banaan ee Bangiga Adduunka. |

*Jaantuska 2: Habka cabashooyinka ee mashruuca*




### 7.0 KHEYRAADKA IYO MAS'UULIYADAHA HIRGELINTA IYO LA SOCODKA SEP

## 7.1 Maareynta

67. Guud ahaan hirgelinta iyo isku dubaridka mashruuca waxaa hoggaamin doona FGS MOEWR. MOEWR waxey la kaashan doontaa dhammaan Wasaaradha Biyaha ee heer dawlad goboleed, si loo fuliyo qaybaha kala duwan ee mashruuca. NPCU ah iyo SPIU oo labada heerba ah, ayaa loo samayn doonnaa FGs iyo FMS , sida ay u kala horeeyaan. NPCU/SPIU waxaa hoggaamin doona iskuduwaha mashruuca, waxaana ku jira koox khubaro ah: (a) Khabiirka maaraynta maaliyadda (FMS); (b) khabiirka soo iibsiga; (c) Khabiirka kormeerka iyo indho-indheynta (M&E); (d) Khabiir dhanka isgaarsiinta ah; iyo (e) Maareeyayaasha mashruuca FMS. Isku-duwayaasha mashruuca ayaa isku dubaridi doona hirgelinta maamulka maalinlaha ah ee hawlaha mashruuca. NPCU waxay sameyn doontaa dib u eegis saddexdii biloodba mar iyo dib u eegis sanadle ah, taas oo lala yeelan doono dhamaan daneeyayaasha mashruuca , sida: Bangiga Adduunka iyo saaxiibada/ ururada ka shaqeeya fulinta mashruuca.

68. Khabiirka bulshada “ Social Safeguard Specialist “ayaa hubin doona in SEP,si ku habboon loo hirgeliyo, loola socdo, loona qiimeeyo. Khuburada (Isaga/iyada), ayaa waxa ay la wadaagi doonaan warbixinnada billaha ah. NPCU ayaa isku dari doona dhammaan warbixinnada , kadibna u gudbin doona warbixinnada saddex biloodlaha ah iyo warbixinnada sannadlaha ah Bangiga Adduunka. NPCU waxey ks shaqayn doontaa maareynta wadajirka ah ee hawlaha mashruuca, go'aan-qaadashada ku saabsan ee la xiriira wada qaabaynta iyo maamulka hawlaha ay ka mid yihiin: qorshaha shaqo ee sannadlaha ah iyo miisaaniyada, lawada socodka hawlaha mashruuca. Waxey sidoo kale, dib u eegis ku sameyn doontaa horumarkii la sameeyay saddexdii biloodba mar, waxay sameysaa go'aamo wadajir ah oo ku saabsan arrimaha khuseeya hirgelinta, hubisaa wada-xiriirka furan iyo la xisaabtanka ugu sarreeya. Kooxda NPCU, waxay ka koobnaan doontaa masuuliyiintan soo socda: iskuduwaha mashruuca, hoggaamiyaasha qaybaha farsamada, khabiirka wax iibsiga, khabiirka maaliyadda, khabiirada deegaanka iyo bulshada iyo sarkaalka M&E.

69. NPCU waxay sal u ahaan doona MOEWR, waxayna mas'uul ka noqon doontaa kormeerka farsamada iyo taageerada MOEWR iyo FMS SPIU, isku duwidda shuraakada, iyo maaraynta maamulka maaliyadda, la socodka hawlaha mashruuca iyo u warbixinta deeq bixiyaha, sida ku cad Jaantuska 1. NPCU ayaa mas'uul ka noqon doonta hawl maalmeedka maaraynta mashruuca, oo ay ku jiraan la socodka iyo ka warbixinta horumarka mashruuca dhammaan daneeyayaasha ay khusayso (fadlan eeg shaxda Shaacinta Macluumaadka). Ujeedadan awgeed, NPCU waxay qabanqaabin doontaa, waqtiyo joogto ah, aqoon-is-weydaarsiyo ay ka qayb qaadanayaan wakiillo ka socda dhammaan daneeyayaasha, si ay u soo bandhigaan horumarka mashruuca iyo raadinta fikradda daneeyayaasha. Kharashyada dhammaan hawlahan waxaa lagu jaangooyay Qaybta 3 ee mashruuca, waxaana lagu hagaajin karaa iyadoo loo eegayo baahida.

## 7.2 Khayraadka/Dhaqaalaha

70. Mashruucu waxa uu qoondaynayaa dhaqaale, si loo hubiyo in hawlihii la qorsheeyay ee ka qaybgalka daneeyayaasha la hirgeliyay, loona kormeeray si hufan. Waxyaabaha ugu muhiimsan ee miisaaniyaddu waa mushaharka shaqaalaha iyo kharashyada la xiriira arimahan soo socda: dhacdooyinka hawsha iyo aqoon-is-weydaarsiyada; ololayaasha isgaarsiinta; tababarrada; gunnooyinka. wax ku biirinta muhiimka ah ee mashruuca, gaar ahaan kooxaha danyarta ah oo laga yaabo in aanay si kale uga qayb qaadan karin, sahannada la xiriira SEP; Habka Cabashada. Miisaaniyadda oo kooban waxa lagu soo bandhigay shaxda 6.

| ***Shaxda 6: Miisaaniyad kooban oo lagu hirgelinayo** qaybaha Miisaaniyadda **SEP*** | ***Unug*** | ***Caddad*** | ***Qiimaha Unuga (USD)*** | ***Inta Jeer/ Sanado*** | ***Bil/Sanad/Saddex biloodle*** | ***Wadarta kharashyada sannadkiiba*** | ***Faallooyinka*** |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| ***Mushaaraadka shaqaalaha iyo kharashaadka la xiriira*** | | | | | | | |
| ***1a. La taliyaha isgaarsiinta*** | ***Qof*** | ***5*** | ***2000*** | ***Laba jeer sannadkii*** | ***2*** | ***20,000*** | |
| ***1b. Qiimaha safarka ee shaqaalaha*** | ***Goobaha*** | ***10*** | ***975*** | ***Saddexdii biloodba*** | ***4*** | ***39,000*** | ***Kharashaadka safarka ee saraakiisha xiriirka bulshada/ degmada*** |
| ***1c. Mushaharka Saraakiisha Xiriirinta Bulshada/Degmada*** | ***Qof*** | ***10*** | ***250*** | ***Bil kata*** | ***12*** | ***30,000*** | ***Mushaarku waa in aanu ka badnayn waxa ay dawladdaugobolka/dawladda hoose bixiyaan. Sidoo kale*** |

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | | ***ma cadda cidda ay shaqaalahani yihiin, sidaa darteed waxaan u qaatay inay noqon doonto sarkaalka goobta*** |
| ***1d. Gunnooyinka loogu talagalay ka qaybgalayaasha shirarka wada tashiga*** | ***Wada tashi kasta*** | ***10*** | ***1000*** | ***Sanad kasta*** | ***4*** | ***40,000*** | ***Waxay ku xiran tahay goobta mashruuca iyo inta jeer ee la booqday.*** |
| ***Wadarta mushaaraadka shaqaalaha iyo kharashaadka la xiriira*** | | | | | | ***129,000*** | |
| ***2. Dhacdooyinka*** | | | | | | | |
| ***2a. Shirarka daahfurka mashruuca*** | ***Gobol kasta*** | ***1*** | ***2000*** | ***Hal mar*** | ***5*** | ***10,000*** | |
| ***2b. Tusaale ahaan. Habaynta kooxaha ee doodaha diiradeysan (FGD)*** | ***FGD kasta*** | ***5*** | ***1000*** | ***laba jeer*** | ***2*** | ***10,000*** | ***Waxay ku xiran tahay safarrada!*** |
| ***Wadarta kharashka dhacdooyinka shaqaalaha*** | | | | | | ***20,000*** | |
| ***3. Ololayaasha wacyi-gelinta*** | | | | | | | |
| ***3a. Daabacaadda dukumentiyada, tusaale ahaan: Boodhadh, waraaqo*** | ***Wadarta lacagta la bixiyo*** | ***1*** | ***5000*** | ***Sanad kasta*** | ***1*** | ***5,000*** | ***Miisaaniyadda dib ayaa loo fiiriyay, si aanan u dhaafin miisaaniyadda guud ee loo qoondeeyey hawlaha SEP*** |
| ***3b. Ololaha baraha bulshada*** | ***Wadarta lacagta la bixiyo*** | ***1*** | ***5000*** | ***Sanad kasta*** | ***5*** | ***25,000*** | ***Miisaaniyadda dib ayaa loo eegay*** |
| ***Wadarta Xiriirada*** | | | | | | ***30,000*** | |
| ***4. Kulamada ka qaybgalka daneeyayaasha*** | | | | | | | |
| ***4a. Kulamada sanadlaha ah ee la xiriira horumarka iyo jawaab celinta daneeyayaasha ee FGS*** | ***Sanadkii ba*** | ***1*** | ***30000*** | ***Sanadka koowaad*** | ***1*** | ***30,000*** | ***FMS waxaa lagu badalay FGS, daahfurka waddanka oo dhan ka dibna FMS heerka koowaad*** |
| ***4a. Kulamada sanadlaha ah ee la xiriira horumarka iyo jawaab celinta daneeyayaasha ee heerka FMS*** | ***Sanadkii ba*** | ***1*** | ***5000*** | ***Sanadka koowaad*** | ***5*** | ***25,000*** | ***Miisaaniyaddu waxay ahayd mid ku yar 5 FMS-yo – miisaaniyadda waa mid xaddidan gaar ahaan haddii wakiillada degmooyinka ay u safri doonaan inay ku biiraan daahfurka*** |
| ***Wadarta Ka qaybgalka daneeyayaasha*** | | | | | | ***55,000*** | |
| ***5. Sahannada ka faa'iidaystayaasha*** | | | | | | | |

| | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| *5a. Tusaale ahaan. Sahanka aragtida mashruuca dhexdiisa* | *Sahan kasto* | *1* | *20000* | *Sanad kasto* | *1* | *20,000* | *Tani waxay ku xiran tahay qaabka sahanka. Waa qaali haddii lagu sameeyo goobta, balse haddii taleefan lagu sameeyo waa ka raqiisan tahay.* |
| *5b. Tusaale ahaan. Sahanka aragtida dhamaadkamashruuca* | *Sahan kasto* | *1* | *25000* | *Sanad kasto* | *1* | *25,000* | *Lamid ah sida kor ku xusan* |
| *Wadarta Ka qaybgalka daneeyayaasha* | | | | | | *45,000* | |
| *6. Habka Cabashada* | | | | | | | |
| *6a. Tusaale ahaan. Tababarka GRC* | *Wadarta lacagta la bixiyo* | *1* | *5,000* | *Sanadka koowaad* | *1* | *5,000* | *Waxaa laga yaabaa in loo baahdo dib u eegis* |
| *6b. Khadadka cabashada ee heerka FMS iyo FGS iyo kararka taleefanka* | *Wadarta lacagta la bixiyo* | *6* | *200* | *Sanadka koowaad* | *12* | *14,400* | *Waxaa laga yaabaa in loo baahdo dib u eegis* |
| *6c. Tusaale ahaan. Qalabka isgaarsiinta ee GM* | *Wadarta lacagta la bixiyo* | *1* | *5,000* | *Sanad kasto* | *1* | *5,000* | |
| *Habka Cabashada Guud* | | | | | | *24,400* | |
| *Wadarta Miisaaniyada ka qaybgalka Daneeyayaasha aan la Saadaalin karin* | | | | | | *303,400* | |
| *7. Kharashka kale* | | | | | | | |
| *7a. Xaalada kedis ah (5%)* | | | *0* | | | *15,170* | |
| *Wadarta Miisaaniyada ka qaybgalka Daneeyayaasha aan la Saadaalin karin* | | | | | | *318,570* | |

## 8.0 LA SOCODKA IYO KA WARBIXINTA

### 8.1 La socodka

71. SEP ayaa dib loo eegi doonaa oo la cusboonaysiin doonaa marmar, haddii loo baahdo si loo hubiyo in macluumaadka iyo hababka ka qaybgalka ay sii ahaadaan kuwo habboon oo waxtar leh,oo la xiriira macnaha guud ee mashruuca iyo borotokoolka COVID-19. Isbeddel kasta oo weyn oo ku yimaada hawlaha la xiriira mashruuca iyo jadwalkiisa ayaa si sax ah uga muuqan doona SEP-ka, la cusboonaysiiyay. Soo koobidda billaha iyo/ama saddex biloodlaha iyo warbixinnada guddaha ee cabashooyinka dadweynaha, weydiimaha iyo dhacdooyinka la xiriira, oo ay weheliso xaalada hirgelinta tallaabooyinka sixidda/ka hortagga la xiriira, waxaa uruurin doona shaqaalaha mas'uulka ah, waxaana loo gudbin doonaa maamulka sare ee mashruuca iyo guddiyada cabashooyinka ee heer FGs iyo FMS iyo heerka bulshaba.

72. Bishiiba ama Saddaxdii biloodba mar ayaa lagu qiimeyn doonaa tirada iyo nooca cabashooyinka iyo codsiyada macluumaadka, iyada oo aanay ka marneyn awoodda mashruucu uu wax uga qaban karo

cabashooyinka, hab wax ku ool ah,isla wakhtiga ku habboon. Macluumaadka ku saabsan hawlaha ka-qaybgalka dadweynaha ee uu mashruuca qabtay sannadka dhexdiisa ayaa loogu gudbin karaa daneeyayaasha laba siyaabood oo suurtogal ah:

i. Daabacaadda warbixin sanadle ah oo gooni ah oo ku saabsan la macaamilka mashruuca ee daneeyayaasha; iyo
ii. Tirada Tilmaamayaal Waxqabad Muhiim ah (KPIs) ee lagu soo bandhigay shaxda 7aad ee hoose, ayaa mashruucu si joogto ah ula socon doonaaa,waana laga warbixin doonaa. Tilmaamayaasha dib ayaa loo eegi doonaa oo la cusboonaysiin doonaa inta lagu jiro xilliga billowga hirgelinta mashruuca.

73. Kooxda mashruucu waxay sahan ku sameyn doonaan, bilowga, bartamaha iyo dhamaadka mashruuca, si loo hubiyo in hawlaha mashruuca loo hirgeliyay si waafaqsan qorshayaasha, iyo si loo hubiyo in dhammaan qalabka mashruuca la hawlgeliyay, lana cabbiro heerka guusha la gaaray iyo qanacsanaanta mashruuca. Natiijooyinka ka soo baxay sahannadan waxaa loo isticmaali doonaa in lagu wargeliyo Bangiga Adduunka iyo dawladda, si ay tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ugu qaado, si loo gaadho ujeeddooyinka SEP iyo yoolalka mashruuca.

74. Habka la socodka ka qaybqaadashada ayaa la dabaqi doonaa inta mashruucani socdo. Xubnaha bulshada oo ay ku jiraan kooxaha danyarta ah ayaa ka qayb qaadan doona la socodka mashaariicda,iyada oo loo marayo guddiyada horumarinta tuulada iyo fagaarayaasha kale ee khuseeya. NPCU waxey hubin doontaa in guddiyada horumarinta tuulooyinka loo dhan yahay,oo ay ku jiraan wakiil ka socda kooxaha danyarta ah. Waxaa jiri doona kulamo dib u eegis ah iyo doodo diirada lagu saarayo ka qaybgalka daneeyayaasha iyo arrimaha maamulka mashruuca,si loo helo jawaab celintooda.

75. Nidaam xog ururin oo ku salaysan moobil ayaa loo isticmaali doonaa in lagu sameeyo sahanno si loo bixiyo xogta dhabta ah ee goobta. Xogta la ururiyay waxaa lagu soo bandhigi doonaa marmar nidaamyada MIS ee mashruuca, si loola socdo waxqabadka waqtiga dhabta ah ee mashruuca, marka loo eego tilmaamayaasha SEP. Xogta lagu soo ururiyay foomamka sahanka ee SEP, waxay saamayn ku yeelan doontaa qaabka guud ee kormeerka iyo qiimeynta (M&E) mashruuca.

***Jadwalka 7 Tilmaamayaasha la socodka SEP***

| Hawlaha | Tilmaamayaasha |
|---|---|
| Guddiyada mashruuca ayaa la aasaasay | • Tirada guddiyada mashruuca ee la aasaasay<br>• Tirada haweenka ee lagu daray guddiyada mashruuca ee la aasaasay<br>• Tirada shakhsiyaadka ka soo jeeda kooxaha la haybsooco ee lagu daray guddiyada mashruuca ee la aasaasay<br>• Tirada dhalinyarada ee lagu daray guddiyada mashruuca ee la dhisay |
| Tababbarka daneeyayaasha ee dareenka jinsiga iyo ka mid noqoshada | • Tirada guddiyada loo tababaray dareenka jinsiga iyo ka mid noqoshada<br>• Tirada shaqaalaha dawladda ee heer Qaran, dawlad-goboleedka iyo dawladda hoose ee loo tababaray dareenka jinsiga iyo ka mid noqoshada<br>• Tirada dadka ka socda kooxda danyarta ah ee ka qayb qaadanaya tababarada ku saabsan dareenka jinsiga iyo ka mid noqoshada<br>• Tirada haweenka ka qaybgalaya tababarada ku saabsan dareenka jinsiga iyo ka mid noqoshada |

| Hawlaha | Tilmaamayaasha |
| --- | --- |
| Ka qaybgalka bulshada iyo ka hawlgalka dadweynaha | • Tirada shirarka wadatashiga deegaanka ee la qabtay<br>• Tirada hogaamiyayaasha dawladda hoose iyo kuwa Qaranka ee la hawlgeliyay/looga warbixiyay SEP<br>• Tirada Wakiilada Bulshada Rayidka ah ee la hawlgeliyay/looga warbixiyay SEP<br>• Tirada shirarka wadatashiga PAP ee la qabtay<br>• Tirada dadka nugul/la haybsooco ee ka qayb galaya shirarka iyo hawlaha la socodka<br>• Tirada haweenka, dhalinyarada iyo dadka gudaha ku barakacay ee ka qeyb galaya kulamada iyo howlaha la socodka |
| Maareynta cabashooyinka | • Tirada cabashooyinka la helay ee la xiriira hawlaha mashruuca<br>• Tirada cabashooyinka la xiriira GBV/SEAH ee la helay<br>• Tirada cabashooyinka si dhakhso ah loo xaliyay (waqtiga loo qabtay)<br>• Tirada cabashooyinka aan waqtigii loogu talagalay lagu xalin, laakiin la dhammaystiray<br>• Tirada cabashooyinka ugu daran ee aan la xalin<br>• Tirada cabashooyinka la soo gudbiyay Nooca natiijooyinka ka soo baxday<br>• Tirada cabashooyinka la soo gudbiyay |

## 8.2 Ka warbixinta

76. Unugta Hirgelinta Mashruuca "NPCU" waxey soo saari doonaan warbixinno joogto ah (sida caadiga ah saddexdii biloodba mar), kuwaas oo ay u baahan doonaan Baangiga Adduunka iyo Wasaaradaha ay khusayso. Warbixinadu waxey soo bandhigi doonaan dhammaan waxqabadyada, oo ay ku jiraan kuwan: hawlaha ka qaybgalka daneeyayaasha,waxayna soo koobayaan cabashooyinka. Warbixinta iyo lifaaqyadeeda, ayaa sidoo kale la faahfaahin doonaa oo la cadeyn doonnaa si loo ogaado tallaabooyinka la qaaday,waxna looga qabto cabashooyinka, waqtiyada jawaabaha, iyo sidoo kale tallaabooyinka sixitaanka iyo yareynta dhibaatada ka iman karta cabashooyinka.

Xogta waxaa ku jiri doona waxyaabaha soo socda:

i. qaybinta macluumaadka ku saabsan waxyaabaha la soo bandhigay;
ii. ogeysiisyada guud iyo ka qaybgalka warbaahinta;
iii. shirarka bandhigga iyo wadatashiga; iyo ururinta iyo isku darka faallooyinka iyo jawaab celinta
iv. Cabashooyin kooban

## LIFAAQYADA

**LIAAQA 1: La tashiyada daneeyayaasha ee agabyada E&S ee Mashruuca Biyaha dhulka hoostiisa/ceelasha ee waara ee Soomaaliya, 4ta Diseembar, 10 subaxnimo ilaa 12.30**

**Ujeedada**: in la helo fikrado iyo talooyin ku saabsan hagaajinta qorshaha ka qaybgalka daneeyayaasha, qaabka maaraynta deegaanka bulshada iyo qaabka qorshaynta dib u dejinta (dukumentiyada qabyada ah waxa la idinkula wadaagi doonaa martiqaad ).

**Ka qaybgalayaasha**: Wakiilada ururada ay khusayso ee ka shaqeeya waaxda biyaha iyo kooxaha danyarta ah ee heer FMS iyo FGS.

| Waqhtiga | Kalfadhiga | Hogaaminaya |
|---|---|---|
| 9-9.15 | Furitaanka iyo hordhaca mashruuca | Abdirizack Mohamed Muhumed<br>Agaasimaha Guud<br>Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha (MoEWR)<br>Suban Nur, Xiriiriyaha Mashruuca |
| 9.15-11 | Khataraha bulshada, tallaabooyinka yaraynta dhibaatada , qorshaha iyo wadahadalka ka qaybgalka daneeyayaasha. Qorshaha ku darida iyo Qaabka Maareynta Dib u dejinta iyo wadahadalka. Ka hortagga iyo wax ka qabashada SEAH | Abdihameed Hassan, Khabiirka Ilaalinta |
| 11-11.15 | Nasasho | |
| 11.15-11.45 | Khataraha deegaanka iyo tallaabooyinka yaraynta | Najeeb Abdullahi Ahmed, Khabiirka deegaanka |
| 11.45-12.30 | Wadahadal iyo xiritaan | Abdirizack Mohamed Muhumed,<br>Agaasimaha Guud<br>Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha (MoEWR)<br>Suban Nur, Xiriiriyaha Mashruuca |

**Ka qaybgalayaasha**

| Magaca | Doorka, Ururka | Iimayl |
|---|---|---|
| Ayan Said | Mashruuca RCRF, Khabiirka GBV | Ayan Said <ayanita.mof@gmail.com> |
| Adow Mohamed Adan | Khabiirka sare ee ilaalinta bulshada | adow46@gmail.com |
| Said Mohamed Said | Hay'adda PRADO Aid Development - Garowe - Puntland - Somalia | Prado.org123@gmail.com |
| Muhumed Hussein | La taliyaha Ilaalinta Bulshada | Muhumed.hussein@gmail.com |
| Ahmed Mohamed Adan | maamulaha mashruuca WASH | sardbay23@gmail.com |

| | | |
|---|---|---|
| Abdishakur Isse Hash | Wasaaradda Maaliyadda ee Dawlad Goboleedka Galmudug, Khabiirka Ilaalinta Bulshada | daangaab10@gmail.com. |
| Mohamed Cartan | Madasha Horumarinta Gasiir (GDF), Dhahar, Sanaag. | mohamedartan22@gmail.com |
| Ibrahim Ambar | Concern Worldwide | Ibrahim.ambar@concern.net |
| Jaffer Aminullah | Wax ka Qabashada Musiibooyinka Somalia, (AADSOM), Maareeyaha Barnaamijka | jaffer.aminullah@aadsom.org |
| Rahmo Omar | RCRF, Hirshabele, khabiirka arrimaha bulshada | rahmoomar9@ gmail.com |
| Ahmed Mohamed Hasan | Agaasimaha Cilmiga biyaha cirka MoEWRS | hydrometeorology@moewr.gov.so |
| Sadia Yusuf Abdi | Khabiirka jinsiga, MoEWRS | Sacdiyo214@gmail.com |
| Suban Nu | Isku duwaha mashruuca, MoEWRS | Subannur38@gmail.com |
| Najeeb Abdullahi Ahmed | Khabiirka deegaanka, SEAP-PIU (MoWER) | Najiib_98@hotmail.com |
| Abdihameed Hassaan | Khabiirka Ilaalinta Bulshada, SEAP-PIU (MoWER) | abdihamid12@gmail.com |
| Kafi Nidum | Khabiirka Ilaalinta / Khabiirka Horumarinta Bulshada Biyoole Project,Puntland/FGS | kaafinidam@gmail.com |
| Abdi Nur Abuu | La taliyaha dhanka isbeddelka deegaanka iyo cimilada, Wasaaradda Deegaanka ee SWS | abdifarmer01@gmail.com |
| Ummul Khair Mohamoud | La taliyaha dhanka isbeddelka deegaanka iyo cimilada, Wasaaradda Deegaanka ee Galmudug | khairiamahmoud9@gmail.com |
| Yassin Ahmed M. | La taliyaha dhanka isbeddelka deegaanka iyo cimilada, Wasaaradda Deegaanka ee Hirshabelle | honyaaska@gmail.com |
| Iman Abdullahi | CARE International | iman.abdullahi@care.org; gure.farah@care.org |
| Abdirashid Haji | Concern Worldwide | haji@concern.net; ahmed.dirshe@concern.net |
| Dr Jiran | Mercy Corps | djiran@mercycorps.org agedi@mercycorps.org |
| Suleiman Ahmed | Danish Refugee Council (DRC) | suleiman.ahmed@drc.ngo william.babumba@drc.ngo |
| Mohamed Geelle | Relief International | mohamed.geelle@ri.org |
| Ibrahim | International Medical Corps (IMC) | |

| | | |
|---|---|---|
| Khadar Ahmed | ANPPCAN-SOM | anppcansom.mogadishu@gmail.com / khaddar.ahmed@anppcansom.org |
| Ahmed Sheikh Ahmed | Chemonics International inc. | asheikhahmed@somaliasfsa.com / bclay@somaliasfsa.com, |

### Arrimaha E&S oo kooban iyo tallaabooyinka yaraynta dhibaatada

<table>
<tr><td></td><td colspan="2">Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta ayaa si faahfaahsan uga warbixisay arrimaha bulshada iyo deegaanka ee mashruuca cusub ee GW4R. Sidoo kale, waxa la soo jeediyaytallaabooyinka yaraynta ee lagu qeexay ESMF, qorshaha ka qaybgalka daneeyayaasha iyo Qaabka Qorshaynta Dib u dejinta (RPF) ee daneeyayaasha. Tani waxa ay dheerayd ku ahayd dulmarka guud ee mashruuca iyo diiradda istaraatiijiyadeed ee uu bixiyay Agaasimaha Guud ( DG.)<br>Qaar ka mid ah qaababka, arrimaha, xeerarka iyo qalabyada ee si faahfaahsan looga hadlay waxaa ka mid ah;<br><br>- Ujeeddooyinka guud iyo sababaynta Qaabka Maareynta Deegaanka iyo Bulshada (ESMF);<br>- Soo bandhig qoto dheer oo ku saabsan qaabka sharciga iyo xeerka la heli karo iyo meelaha bannaan ee la xiriira ilaalinta deegaanka iyo bulshada;<br>- Bixinta aragti guud oo ku saabsan Badbaadada Deegaanka iyo Bulshada ee Bangiga Adduunka, si ay daneeyayaashu u fahmaan sida loola xiriiriyo ESS-yada kala duwan;<br>- Khataraha bulsho iyo deegaan ee ka iman kara mashruuca ayaa si faahfaahsan loogu soo bandhigay ka qaybgalayaasha shirka Daneeyayaasha. Aqoonsiga khatarta, qorshaynta tallaabooyinka yaraynta iyo la xiriirka dadka ay khusayso, waxaa si fiican u sheegay khabiirka arrimaha Bulshada. Waxaa sidoo kale la ogeysiiyay ka qaybgalka joogtada ah ee daneeyayaasha mashruuca.<br>- Sidoo kale, waxaa la soo bandhigay Habka Wax ka Qabashada Cabashooyinka (GRM) iyo siyaabaha kor loogu qaado/wax ka qabashada cabashooyinka mashruuca. Tan waxaa ka mid ah si qarsoodi u xalinta arrimaha xasaasiga ah, oo ay ku jiraan rabshadaha ku salaysan jinsiga (GBV.)<br>- Qorshaha ka hortagga iyo tallaabada GBV ee mashruuca ayaa la soo bandhigay si looga jawaabo khatarta GBV/SEAH ee mashruuca, kuwaas oo ay ku jiraan saxiixa Xeerka Anshaxa ee dhammaan shaqaalaha mashruuca.<br>- Dulmar guud oo ku saabsan caqabadaha muranka dhulka, farriimaha yaraynta ee maaraynta dib u dejinta iyo magdhowga, ka hortagga saamaynta xun ee mashruuca iyo ka qaybgalka hufan ee daneeyayaasha barnaamijka.</td></tr>
<tr><td></td><td>Arrimaha la isweydiiyay</td><td>Sidee ayaa looga hadli doonaa/wajahi mashruuca gudahiisa</td></tr>
<tr><td>1.</td><td>Waa in si cad loo sheegaa doorarka iyo mas'uuliyada hay'addu ku leedahay hirgelinta mashruuca FGS iyo FMS labadaba.</td><td>DG-gu waxa uu qeexay qaar ka mid ah qabanqaabada hay'adaha mashruuca ee hore loo yaqaanay, una baahanayd wadahadal joogto ah oo lala yeesho dhammaan daneeyayaasha mashruuca tooska ah, iyo waliba dhammaan wejiyada mashruuca. Unuga hirgelinta mashruuca wuxuu yeelan doonaa mas'uuliyadda guud ee mashruuca, kaas oo la dejin doono Wasaaradda Biyaha oo wakiil ka ah dhammaan FMS-yada.<br><br>Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan doorarka mas'uuliyadaha ayaa si cad loogu muujin doonaa dukumeentiyada mashruuca, si loogu fahmo si wanaagsan. Qaar ka mid ah dukumeentiyada mashruucana waxaa lagu wadaagi doonaa dibadda/ meel ka baxsan aaga shaqada,</td></tr>
<tr><td>2.</td><td>Caddayn ku saabsan horumarka heerka horumarinta mashruuca</td><td>Mashruuca waa la diyaarinayaa; waxaa jiray ka qaybqaadasho horumarsan oo hay'adaha si toos ah u fulinaya horumarinta mashruuca ilaa heerkan.</td></tr>
<tr><td>3</td><td>Sidee ayay Soomaaliya ula wadaagi doontaa/u raadin doontaa xogta iyo macluumaadka wadamada deriska ah ee mashruucan?</td><td>Xarunta xog ururinta ayaa loo samayn doonaa mashruucan ku salaysan gobolka.</td></tr>
</table>

| | | |
|---|---|---|
| | | Wasaaradda Biyaha waxa ay ku shaqayn doontaa habab la dajiyay, sida IGAD oo la xidhiidha wada shaqeynta iyo xog/ macluumaad wadaagga dalalka deriska ah. |
| 4 | Sababta diirada loo saarayo biyaha dhulka hoostiisa oo aan looga faa'iidaysanayn biyaha qaybta sare ee dhulka dalka. | Mashruucan ayaa diiradda lagu saarayaa biyaha dhulka hoostiisa ku jira in la sahmiyo, khariidad laga sameeyo, lagana faa'iidaysto kheyraadka biyaha dhulka hoostiisa ku jira ee dalka ,marka laga soo tago isticmaalka hada jira ee ilaha kale ee biyaha.<br>Roobab la'aan iyo abaaro is daba joog ah awgeed, isticmaal darro, iyo kaabeyaasha biyaha qaybta sare ee dhulka oo duqoobay awgeed, Wasaaraddu waxay u aragtaa biyaha dhulka hoostiisa inay yihiin beddelka suurtagalka ah. |
| 5 | Sidee buu mashruucu u hirgelinayaa hawlaha? | Hadafka mashruuca ayaa ah in la kordhiyo xirfadaha.<br>Dawladda federaalku waxay siin doontaa maamul goboleedyada awood ay ku fuliyaan howlahooda, dawladda federaalka iyo Bangiga Aduunka ayaa kormeeri doona tallaabooyinkaas. |
| 6 | Mashruucu sidee buu uga gudbi doonaa arrimaha xuduudaha ee dawlad goboleedyada oo ay Somaliland ku jirto? | Naqshadeynta mashruuca waxaa hagi doona la tashi buuxa oo dhammaan daneeyayaashu ku jiraan, gaar ahaan bulshooyinka ka faa'iideysanaya, si looga hortago khilaaf iyo isku dhac kasta oo ka yimaada hirgelinta mashruuca kadib.<br>Goobta lagu qabanayo iyo sidii loo xalin lahaa arrimaha xudduudaha ee xasaasiga ah, ayaa waxaa socda wada hadal u dhexeysa madaxda dawladda federaalka. |
| 7 | Sidee buu mashruucu u maarayn doonaa khataraha bulshada? | Khatarta Bulshada iyo Deegaanka in la ogaado, la dejiyo oo la yareeyo si loo joojiyo saamaynta xun ee ay mashruuca ama daneeyayaasha mashruuca ku yeelaneyso.<br>Mashruuca si uu u yeesho khibrad bulsho iyo mid deegaan oo gaar ah ,si uu u caawiyo hirgelinta qalabka bulsho ee ku haboon.<br>Mashruucu wuxuu mudnaan siin doonaa dhisidda xirfadaha iyo taageeridda hay'adaha iyo waaxaha hirgelinta.<br>Wadaagista macluumaadka daneeyayaasha iyo habka ay ku cabiraan aragtiyaha iyo cabashooyinka waa la samayn doonaa oo loo gudbin doonaa daneeyayaasha mashruuca si looga faa'iidaysto si waxtar leh. Waxaa sidoo kale jiri doona maarayn qarsoodi ah ee cabashooyinka iyo sheegashooyinka xasaasiga ah sida GBV.<br>Mashruucu wuxuu si taxadar leh diirada u saari doonaa yaraynta khatarta bulshada. |
| 8 | Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha miyay sameysay khariidad biyo la'aanta dhulka hoostiisa ee heer federaal? | Khariidadda weli lama dhammaystirin |
| 9 | Sidee ayuu mashruucani u caawin doonaa bulshada? | Bulshada waxaa la siin doonaa adeegyo biyo oo wanaagsan, sidoo kale waxaa loo tababari doonaa sidii ay u maamuli lahaayeen goobahooda biyaha. |
| 10 | Mashruuca ma laga hirgelin doonaa magaalooyinka iyo miyiga? | Mashruucu wuxuu samayn doonaa daraasad ku saabsan suurtogalnimada meelaha mashruuca laga fulin karo; sidoo kale mashruucu wuxuu fuliyaa ka qaybgalka bulshada |
| 11 | Sidee buu mashruucu u xalin doonaa arrimaha muranka dhulka? Dhulku waa isha ugu weyn ee murannada iyo khilaafaadka dalka ka jira, iyo loolanka loogu jiro kheyraadka yar ee biyaha iyo sidoo kale goobaha biyaha. | Dadka deegaanka iyo kuwa dhulka isticmaala ayaa loo sameyn doonaa khariidado, waxaana heshiisyo laga heli doonaa dhamaan kooxaha ay ka midka yihiin dawladaha hoose iyo guddoomiyeyaasha.<br>Daahfurnaanta iyo caddaaladda shuruudaha xulashada meelaha biyaha laga helo waa in la taageero. |

| | | |
|---|---|---|
| 12 | Isku duwidda hawl wadeennada kale ee dawladda ee khuseeya meelaha gaarka ah ee khibradda, tusaale ahaan, arrimaha deegaanka; Qaar ka mid ah xeerarka lagu sheegay bandhigga, Agaasinka Deegaanka waxa uu horay uga soo shaqeeyay xeerar; | Mashruucu waxa uu la kaashan doonaa hay'adaha kala duwan ee dawladda, si ay uga faa'iidaystaan khibradooda, ugana qayb qaataan taageerada mashruuca. |

**Faalloyinka/ Sharraxaada**

Ka soo qayb galayaasha shirka ayaa si firfircoon uga qayb qaadanayey shirka, waxaana ay la wadaageen dareenkooda iyo talooyinkooda. Qaar ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa ka walaacsanaa lahaanshaha dhulka iyo sidii mashruucan looga hirgelin lahaa dhulka miyiga ah, iyadoon wax dhib ah laga dhex abuurin beelaha. Wixii ugu waaweynaa ee ay ka soo qeyb galayaasha shirka ka hadleen wuxuu ahaa, in dawladda federaalka ay gebi ahaanba mas'uul ka tahay fulinta mashaariicda ama in dawladda federaalka ay u igman doonto mas'uuliyadda maamul goboleedyada. Si kastaba ha ahaatee, ka qaybgalayaashu waxay ku qanceen soo bandhigida guud ee mashruuca oo ay soo bandhigeen kooxda mashruuca.

## LIFAAQA 2: Tusaalaha foomka cabashooyinka

1. **Faahfaahinta Cabashada**

Magaca oo buuxa ama lambarka tixraaca (haddii la codsado sirta):

______________________________________________

Lab/Dhedig

Moobeel ______________________________

Iimeyl______________________________________

Degmada____________________________________

Xiriirka uu la leeyahay mashruuca

______________________________________________

Da'da (oo sanado ah): ______________________________

2. Waa kuwee hay'adda ama sarkaalka/qofka aad ka cabanayso?
   Wasaaradda/waaxda/hay'adda/shirkadda/kooxda/qofka____________________
   ____________________

______________________________________________

______________________________________________

3. Ma u sheegtay arrintan hay'ad/shaqaale dawladeed oo kale?
   ☐ Haa ☐ Maya

4. Haddii ay haa tahay, waa kee?______________________________

______________________________________________

5. Arrintan ma lagu soo oogay maxkamad?
   ☐ HAA ☐ MAYA

6. Fadlan si kooban u soo koobo cabashadaada oo kuna lifaaq dhammaan dukumiintiyada caddeymaha [Xusuusin si aad u sheegto dhammaan faahfaahinta waxa dhacay, meesha ay ka dhacday, goorta ay ka dhacday iyo cidda sameysay]

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

7. Maxaa tallabo oo aad dooneysaa in laguu sameeyo?

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

_______________________________________________________________________________

Saxiixa ___________________________________

Taariikhda_______________________________________

## LIFAAQA 3: Tusaalaha diiwaanka cabashooyinka

| **Taariikhda** | **Magaca iyo lambarka xiriirka eecabashada(ama lambarka tixraaca haddii aan la aqoon)** | **Shaqaalaha/ hay'adda laga cabanayo** | **Nooca cabashada/arrinta adeegga, tusaale ahaan, dib u dhac** | **Nooca sababta - aadanaha muuqaalkiisa (tusaale.<br><br>saraakiil aan tayo lahayn, gaabis ah, aan kuu jawaabaynin) ama ururka (tusaale, mashaariicda, nidaamyada, xeerarka)** | **Xalka loo ogolaaday** | **Tallaabo sixid/ka hortag oo ah in la qaado** | **Jawaab celinta la siiyey cabadaha iyo ogolaanshaha la siiyey** |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | | |
| | | | | | | | |
| | | | | | | | |
| | | | | | | | |

## LIFAAQA 4: Tusaalaha foomka warbixinta cabashooyinka

| Muddo 3 bilood (taariikhda bilowga iyo dhamaadka) | Tirada cabashooyinka la helay (tirada ka timid haweenka) | Nooca ugu weyn ee cabashada | Kanaalka ugu weyn ee cabashada loo adeegsado | Tirada cabashooyinka la xaliyay | Tirada cabashooyin xalka sugayo | Celceliska muddada lagu qaatay xalinta | Talo soo jeedinta hagaajinta nidaamka |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | | |
| | | | | | | | |
| | | | | | | | |
| | | | | | | | |

## LIFAAQA 5: Tixraacyo


World Bank Environmental and Social Framework http://documents.worldbank.org/curated/en/383011492423734099/pdf/114278-WP-REVISED-PUBLIC-Environmental-and-Social-Framework.pdf

World Bank Guidance note on ESS10: Stakeholder Engagement and Information Disclosure http://documents1.worldbank.org/curated/en/476161530217390609/ESF-Guidance-Note-10-Stakeholder-Engagement-and-Information-Disclosure-English.pdf

World Bank Good Practice Note on Gender: http://pubdocs.worldbank.org/en/158041571230608289/Good-Practice-Note-Gender.pdf

World Bank, Grievance Redress mechanisms, Responsible Agricultural Investment (RAI) accessed on 14th January 2019 at: http://www.worldbank.org/en/topic/agriculture/publication/responsible-agricultural-investment

World Bank (n.d.) How to Notes: Feedback Matters: Designing Effective Grievance Redress Mechanisms for Bank-Financed Projects Part 1: the Theory of Grievance Redress http://documents.worldbank.org/curated/en/342911468337294460/The-theory-of-grievance-redress

World Bank (n.d.) How to Notes: Feedback Matters: Designing Effective Grievance Redress Mechanisms for Bank-Financed Projects Part 2: The Practice of Grievance Redress http://documents.worldbank.org/curated/en/658351468316439488/The-practice-of-grievance-redress